*[ Janaury 2011 ]*

UNHCR

# KA QEYB GALKA ISKU SHAANDHAYNTA HOWLAHA UNHCR







# Fariin

Qalabkan waa natiijadii karti dad badan oo laysu geeyay. Waxay ka soo hartay wadahadalo iyo ku biirin dhamaan shaqaalaha Hayadda Qaxootiga iyo Hayaddaha kale ee ka la shaqeeya xarumaha Qaxootiga iyo Xarunta dhexe ee Geneva ee laga maamulo Hayadda Qaramada Midoobay Qaxootiga u qaabilsan. Waxaa lagu tijaabiyay 14 dal waxaana lagu dabaqay 40 mashruuc oo ay maamushu UNHCRta.

UNHCRta waxay jeceshay in ay uga mahadceliso dhamaan dadkii wax ka gaystay horumarrinta qalabkan .

Cid kastaa ee kale way soo saari kartaa, oo u turjimi kartaa luqado kale ama way ku shaqayn karaan si ay u buuxiyaan baahidooda iyagoon waydiisanin wax ruqsad ah Hayadda UNHCRta , balse:

- In dhamaan loogu qaybiyo dadka lacag la'aan
- UNHCRtana la la socodsiiyo

UNHCRta aad bay ugu farxi lahayd hadii loo soo gudbiyo nuqulo ka mid ah luqadaha lagu turjimay.

Qaybtii ugu horaysay , May 2006

**Hayadda Qaramada Midoobay u qaabilsan arrimaha Qaxootiga**

**94.Rue de Montbrillant**

**1202 Geneva**

**Switzerland**

**Website: www.unhcr.org**

**IV . Gebogebo** **50**

**V. Lifaaqyo** **51**

**Lifaaqa 1aad:** **Suuragal Qatarta Amaanka.....................................................53**

**Lifaaqa 2aad:** **La xirriirista dhalaanka yar yar................................................56**

**Lifaaqa 3aad:** **Mowduucyada iyo su'aalo tusaalayn ku xiran qatarta.................58**

**Lifaaqa 4aad:** **Warqada ama Nidaaminta foomamka..........................................62**

**Lifaaqa 4aada:** **Nooc ka mid ah warqada ama foomka Nidaaminta......................64**

**Lifaaqa 5aad** **Warbixin ku saabsan kala mudnaysiinta iyo kala shaandhaynta ka qayb galka...........................................................................................66**

**Lifaaqa 6aad** **Kaydinta fadhiyada.......................................................................68**

**Lifaaqa 6aada** **Nooc ka mid ah sida loo kaydiyo fadhiyada..................................69**

**Lifaaqa 7aad** **Nooc ka mid ah waqtiyeenta fadhiyada.........................................70**

**Fariinta ugu danbaysay**

**Falanqaynta ka qayb galka mashaariicda**

- **Hurudhac:**

Qaxooti, barakac gudaha dalka iyo qaxootiga dib ugu soo noqda dalkooda, waxaa lagama maar maan ah in ay ka mid noqdaan xuduntii wada hadalka marka laga hadlaayo arrimo quseeya megangelyadooda, amaankooda iyo wanaaga noloshooda guud. Si loo helo garasho mug leh eek u saabsan amaan darada soo waajahda. Waxaa lagamamaarmaan ah in iyaga lagala tashado si toos ah is la markaasna la dhagaysto . Xaq bay u leeyihiin in laga qayb geliyo arrimaha saameeya noloshooda bani aadam nimo iyo siyaasadaha UNHCRta iyo xeerarkeeda. Qaas ahaan qodobka ku saabsan amaanka *1

Ka qayb qaadashada ay ka qayb qaataan haweenka qaxootiga ah, nimanka qaxootiga ah, dhallinyarada iyo dadka da'da ah oo dhamaantood ka kala socda asalo kala duwan,

qaas ahaan marka la sharxayo mashaakilada jira iyo habka qorshaynta mashaariicda si ay iyaga uga faa'idaystaan waa arrin muhim ah ka shaqayteeda, gacan ka gaysigeeda iyo daafacaadooda si loo xaqiijiyo howlgal mashruuc la taaban karo.

Maxaa loola jeedaa shaandhaynta iyo ka qaybgalka ?

Ka qaybgalka shaandhaynta * 2 waa hab iyo hanaan lagu dhisayo wada shaqayn dhexmarta qaxootiga haween iyo rag oo da' kasta leh iyo also kala duwan iyadoo loogu gogol xaarayo ka qaybgal mecno leh iyadoo loo marayo wada hadalo hab nidaamsan ( kala danbayn leh). Ka qaybgalka shaandhaynta waxaa ka mid ah wada hadal ku aadan haweenka dhexdooda, gabdhaha, wiilasha iyo raga iyadoo ay ku jiraan dhallinyarada dhexe. Iyadoo u jeedada ay tahay in la soo ururiyo xog sax ah oo ku saabsan nabadgelyo la'aanta soo wajihi karto iyo sababaha ka danbeeyo.

In la fahmo awooda ay iyagu u leeyihiin in ay xallistaan iyo in la dhagaysto talooyinkooda ay iyagu u arkaan xal.

Ka qaybgalka shaandhaynta waxaa ka mid ah la hadlida haweenka, gabdhaha, wiilasha iyo raga la tixgeliyo iyo iyadoo si wada jir ah loo xaliyo dhibta soo food saarta. Waxay ka saacidaysaa abaabulka bulshada qaxootiga ah si loo qaato go'aan wada jir ah si loo hormariyo korna loogu qaado amaankooda si loo sameeyo saldhig ku salaysan hirgelinta xuquuqda bulshada.* 3 ( eeg mabaadiida xukunta)

Ka qaybgalka shaandhaynta waa hal nooc oo ka mid ah falanqaynta xaaladaha iyo fahamkooda.

---

***Maxaa lola jeedaa falanqaynta xaaladaha?***

Marka laga hadlayo Haydadda UNHCRta iyo falanqaynta xaaladaha waa arrin ku xiran saddex weji.

- **Wejiga hore 1: Falanqaynta xaaladaha ama xogta markaas jirta ama taagan**

Dhamaan xogta jirta qaas ahaan xaalada qusaysa qaxootiga, dadka gudaha dalka ku barakacay iyo ama dadka ku soo noqday dalkooda ay**aa la shirinaayaa, xogta la soo ururinaayo waxaa ka mid ah warbixinada dalka ay ku suganyihiin, warbixin sanadeedka nabdgelyada iyo amaanka, xogta tirakoobta iy**o tafaasiishiisa ama faahfaahintiisa iyo warbixinta ku saabsan qiyaasaha caadiga ee nolosha looga baahanyahay (S&I). sidoo kale dhanka siyaasada warqadaha sharciga ah iyo warbixinada ay ka sameeyeen Hayadaha kale iyo Urурada kale iykuwada ay ka dhexeeyso howlwadaaga. Warbixintaa la soo ururiyay waa in dib loo eegaa iyadoo


lagu salaynaayo dhanka da'da, xaalada jinsiga iyadoo la eegaayo asal kala duwanaanta si loo cadeeyo farqiga xogta ku salaysan amaankooda, marka loo eego howlaha loo qabanaayo bulshada qaxootiga ah, kaalmada loo fidiyo iyo ka hadlidooda.

- **Wejiga 2: Ka qayb galka falanqaynta**

  Waxaa la diyaarinayaa wada hadal gaar ahaan haweenka, gabdhaha, wiilasha iyo raga da' kastaba leh kana soo jeedaan asalo kala duwan. Waxaa loogu deeqayaa fursad ay ku sharxaan amaan darada haysata iyo in ay qayb ka noqdaan qorshaynta iyo xal u helista arrimaha saameeya noloshooda .

- **Wejiga 3: Ka qaybgalka qorshaynta**

  Fadhiyada qorshaynta ayaa la qabanayaa iyadoo lagu diyaarinaayo Qorshe sanadeedka howlgalada wadanka (COP) si loogu gudbiyo xarunta UNHCR ee Geneva. Ka qaybgalayaasha waxaa ka mid ah deeq bixiyayaasha, dowladaha martigeliyay qaxootiga, NGO-yad fuliya mashaariicda UNHCR-ta, howl wadaagayaasha mashaariicda UNHCRta iyo dadka qaxootiga ah* 4 si wada jir ah. Waxay dib u falanqayn iyo dib u eegisba ku samaynayaan warbixinadda la horkeenay waxaana halkaas laga soo saari u jeedooyinka, hadafka la tiiksanayo heer dal.*5



***Shaandhaynta ka qaybgalka jaangooyada***





Falanqaynta xaaladaha

Wajiga 1

Falanqaynta xaaladaha ama xogta markaas jirt
ama taagan• Hababka dhaqan
dhaqaale,siyaasada iyo habka sharciyada

• Tirada dadka diiwaangelinteeda iyo asal kala
duwanaashaha
• warbixinta ku saabsan qiyaasaha caadiga ee
nolosha looga baahanyahay (S&I)
• Warbixinada Dalka
• Warbixin sanadeedka amaanka
• Iyo warbixinada kalw ee Hayadaha iyo
howlwadaagayaasha

Wejiga 2:

Ka qayb galka falanqaynta
Wadahadal habaysan la la yeesho
qaxootiga/ dadka ku barakacay dalka
gudahiisa/ iyo kuwa soo laabtay oo kala a
haweenka iyo raga, gabdhaha iyo wiilasha
oo dhammaantood asaladooda ka la
duwanyahay si:

• Loosoo bandhigo cabsida amaanka ay
qabaan iyo kaalmada ay u baahan karaan
• Loo soo bandhigo sababaha asalka u ah
cabsida amaanka ay qabaan
• Loo soo bandhigo awooda ay bulshada
xaqootiga u leedahay in ay is difaacdo iyc
halka ay ka soo dhalan karaan
• Looga wada falanqoodo xallintooda iyo
sida ay ukala horeeyaaan

Wejiga 3: Ka qaybgalka qorshaynta§ Wejiga 3: Ka qaybgalka qorshaynta
Qaybaha dowlada eek u aadan, fuliyayaasha mashaariicda UNHCRta, howlwadaagayaasha iyo wakiilada dadka qaxootiga, kuwa soo barakacay iyo kuwa soo noqday si

- Dib u eegis iyo falanqayn wararkii la soo ururiyay
- Sharaxaad laga bixiyo Istraatijiyada amaanka
- Sawirka mashaariicda iyadoo la eegayo dhinaca
  a) Hadafka amaanka xooga la saarayo
  b) Howlgalka ku salaysan bulshada qaxootiga ah
  c) Da'da, jinsiga ( rag iyo dumar) iyo I shaarooyinka kala duwanaanta



Outputs: (Miraha banaanka yaal ee qayriin ka ah si loo karsho)

Istratijiyad amaanka

Warbixin sanadeedka amaanka iyo nabadgelyada ku saabsan

Warbixinta dalka

Soo gudbinta mashaariicda oo faahfaahsan

Hishiisyada lala galo howlwadaagayaasha

Qorshaha howlaha dalka

Outcomes: Natiijada ama ujeeda

Hab maamul iyo maarayn ku salaysan natiijada loo baahanyahay kaliya

Ka amba qaadis xuquuqda ay leedahay bulshada qaxootiga ah

Da'da, jinsiga (rag iyo dumar) iyo falanqaynta kal duwanaashaha.

Dhamaystirida saddexda weji xaaladaha lagu falanqaynayo waxay ku hogaamisaa in la helo **in** la helo nabadgelyo iyo amaan Istiraatijiyada qorshaha UNHCRta ee dalka ay markaas ka howgelayso.

Xogta la soo ururuxiyay laguna falanqeeyay habkaan lawada fahamsanyahay wuxuu inoo soo babdhigayaa furayaasha mashaariicda ee sida qorshaha howlgalka wadanka (COP) warbixinta wadanka, warbixin sanadlaha ku abaaran amaanka iyo nabadgelyada , soo gudbinta mashaariic faahfaahsan iyo misaaniyadaha.

**Waa maxay qalabka la isticmaalayo?**

Habkan ama qalabka waa hab iyo hanaan is daba taxan oo ay lagamamaarmaan tahay in la dabo galo si loo qabto falanqayn iyo jaangooyn loola sameeyo qaxootiga iyo dadka kale ee ay qusayso arrimaha UNHCRta. Si nidaam ah hadii loo hirgeliyo, waxay natiijadu noqonaysaa in haweenka, raga, gabdha iyo wiilasha ee da' waliba ka kooban

iyo waayo aragnimadooda kala duwan waxay fursad u siini in ay ku cadaystaan codkooda qatarta ka haysata dhanka amaanka iyo nabadgelyada , kala mudnaanta iyo xallintooda sidaas darteedna si wax ku ool ah u ga qaybqaata horumarrin sanadeedka (COP) . iyadoo la ogyahay xafiisyada qaarkood in ay horayba u bilaabeen qorshaha noocan ah iyagoo la shira si kala duwan qybaha qaxootiga. Qalabkan ama nidaamkan wuxuu ku biirinayaa talooyin siyaada ah iyadoo ujeedadu ay tahay in nidaam habaysan loogu tilaabsado falanqaynta ka qaybgalada iyo in kaalin laga gaysto habka lagu soo saaro ama lagu gaaro natiijo wax ku ool ah iyadoo la kaashanaayo habka qorshaynta.

Ujeeda guud ee qalabkan waa sidii looga saacidi lahaa xafisyada si loo xoojiyo howlwadaaga iyo dadka ay qusayso ( qaxootiga) . si loo soo ururiyo warbixin saldhig ah ee dhinacyada da'da, jinsiga ( rag iyo dumar) iyo taxliilka kala duwanaashaha iyo horumarrinta habka ugu wanaagsan ee Istratijiyada lagu amaan

- Taxliilinta halista amaan darada iyo waxa ku dhici kara dadka qaxootiga ah.
- In la soo geliyo dadka qaxootiga ah habka qorshaynta, jaangooynta , fulinta, kormeerka iyo qiimaynta howlaha dhamaan wareega mashaariicda qorshaha.

  In UNHCRta lagula xisaabtami karo ( xisaabi xilmaleh) howlaha ay qabato.

---

**Yaa loogu tala galay qalabkaan ?**

Iyadoo la ogyahay in ay jirto habab kale ee ka qaybgalka shaandhayta .

Hadana UNHCRta waxay horumarisay qalabkan si uu u noqdo dariiq lagu taageero howlgaladda mashaariicdeeda. Sidaa darteed qalabka waxay ujeedadiisa tahay in lagu taageero UNHCRta xarumaheeda caasimadaha iyo howgaladeeda meelaha ka fog xarunta xafiisyada caasimada si loo qabto ka qaybgalka shaandhaynta ee howlwadaaga ah. Waxaa muhiim ah dhamaan qaybaha iyo howlgalada in ay kaalin ka gaystaaan shaandhaynta ka qaybgalka ee qaxootiga, si looga wada xaajoodo qatarta ka imaan karta dhanka amaanka si guud ahaan ah. Dib u eegista iyo taxliilinta qatarta amaanka, kala mudnaysiinta iyo xuluusha ka imaan karta ka qaybgalka shaaandhaynta. Taas oo u baahan in loo maro hab nidaamsan . sidaa darteed UNHCRta waxay fududaynaysaa, hirgelinaysaana waxa loo yaqaano kooxaha wadajir ku shaqeeya (MFT) si uu xafiiska u hogaamiyo hababka wax ka qabashada da'da , jinsiga ( rag iyo dumar) iyo joogtaynta ka warhaynta kala duwanaashaha.

kooxaha wadajir ku shaqeeya ( MFT) waa ugu yaraan in uu ka koobnaado sarkaalka dhanka amaanka iyo nabadgelyada qaabilsan, saraakiisha qaybta qorshaynta iyo saraakiisha qaybta arrimaha bulshada. Guud ahaan waa in laga helaa saraakiil

haween iyo ragba ka la ah, waana in ay kakala socdaan dhanka shaqaalaha gudaha dalka u dhashay iyo kuwa caalamiga ah (national and international staff) oo heerarkoodu kala duwanyahay. Guusha kooxaha wadajir ku shaqeeya waxay ku xirantahay hogaamiye adag karti iyo go'aan qaadasho maamul leh, qaas ahaan Madaxda xafiiska iyo ka qaybgal firfircooni leh ee xubnaha kooxaha. Xafiiska waa in uu si sugan u hubiyaa in ka qayb qaadashada ay tahay mid sal balaaran ee sida howlwadaagayaasha, xubnaha dowlada, NGOyada iyo xubnaha kale ee Hayadaha UNta iyo deeqayaasha hadba sida ku haboon.

**Goormee qlabkaan la isticmaali karaa, xilliyaga wareega Barnaamijka?**

Sida lagu cadeeyay qaybta 4aad ee marjaca buuga UNHCRta. Layliga Ka qayb galka shaandhaynta qorshaha eel ala qorshaynayo qaxootiga wuxuu ka mid yahay wareega qorshe sannadeedka *6. Guud ahaan layliga waa in la sameeyaa ka hor inta aan la soo gudbin faahfaahinta mashruucyada loogu talo galay sannadka soo socda micnaha ( inta u dhaxeeysa bilaha Sebteember iyo Novfember). Xogta waxaa laga soo ururinayaa kooxo kala duwan oo qaxootiga ka tirsan xilliga uu dhacayo ka qaybgalka shaandhaynta , waxaa kaloo ka mid ah waxyaabaha sal dhiga u ah warbixin sanadeedka amaanka, warbixinta guud ee dalka iyo qorshaha howlgalka dalka (COP). Ka dib halkaa waxaa lgu wargelinayaa qabashada siminaarka ka qaybgalka shaandhaynta, farsamaynta progaraamyada iyo habka qorshaynta hadba sidii loogu baahdo maamul ku salaysan wax soo saar (RBM). Maamulka ku salaysan wax soo saarka (RBM) wuxuu isugu yeerayaa qadkii qorshaynta iyadoo lagu salaysiinaayo wax soo saar oo aan ahayn ilo ( resources) .

Waxay ka koobantahay 4 qaybood:

- Ka qaybgalks shaandhaynta iyo taxliilinta dhexmartaa xubnaha muhiimka ah
- Taxliilinta nuxurka mushkiladaha
- Abuurista hadafka ama u jeedada ka ma dambaysta ah iyo
- Kormeerka habka loo hirgelinaayo

Qalabkan ka qaybgalka shaandhaynta waa in la isticmaalaaa dhamaan nolosha wareega prograamyada UNHCRta si loo helo wadahadal habeeysan oo ku wajahan qaxootiga siiba marka la hirgelinaayo, kormeeraayo iyo qiimaynta howlaha iyo kaalmada ku aadan dhinaca amaanka qaxootiga*7. Marka uu qalabka xooga saaraayo isku xirka ka qaybgalka shaandhaynta iyo hab wareega parnaamijka sida ku cad qaybta 4aad ee buuga UNHCRta way ahaan kartaa waana loo isticmaali karaa dhinacyo baddan sida iskaa dib u noqoshada, ka midnoqoshada ka dib marka wadankii loogu noqdo iyo ka mid noqoshada wadanka ay ku noolyihiin ( hoos eeg).

- ***Ka qaybgalka qorshaynta iyo noocyadeeda***

Marka la qabanaayo kaqaybgalka qorshaynta meel aaan ahayn xero oo ay tahay qaxooti jooga magaalooyinka ama dad ku bara kacay dalkooda dhexdiisa ama dad ku soo noqday dalkooda. Waxyaabaha ugu waawayn ee ka horimaanaya waxaa ka mid ah : in la helo meelo ama xafiisyo joogto ah oo ay la soo xiriiraan, in la helo xog lagu kalsoon yahay iyo in la abuuro farsamo ama shax muujinaysa heerka iyo xaalada qatarta amaanka. Matalan marka ay tahay xero dhexdeed waxaa furo u ah si loo hirgeliyo ka qaybgalka qorshaynta habka ugu haboon waa la xiriirista mujtamaca ku nool xerada. Iyadoo loo sheegaayo waqtiyada la kulmi karo , meesha lagu kulmaayo lalana qorsheeyo. Waxaa kaloo ka mid noqon karo iyadoo la la shaqeeyo gudiga bulshada ee markaas jira sida gudiga arrimaha diinta, dhallinyarad, gudiga caafimaadka, iyo ururada bulshada ee ka jira bulshada dhexdeeda iyo ururada NGOyada maxaliga ah. Iyadoo loo soo maraayo kooxahan ayaa markaas la sii ballarinkaraa hadii loo baahdo.

Marka laga hadlaayo qaxooti ku nool magaalooyinka waxaa la ogyahay inta baddan dadka waxay deganyihiin meelo kala fog, wayna adagtahay in si sahal ah loo gaaro ama loo soo abaabulo. Kooxaha wada jirka u shaqeeya (MFT) gaar ahaan shaqaalaha maxaliga ah iyo NGOyad maxaliga ah ayaa bilaabaya xogwaraysi iyo ka wardoonis meelaha ay deganyihiin dadka qaxootiga ah raga/ haweenka/ dhallaanka gabdho iyo wiilalba qaas ahaan kuwa ay iyaga garanayaan waxayna samaynayaan kulamo aan rasmi ahayn iyo shabakad isku xir ah sidii loo samayn lahaa ka qaybgalka shaandhayn sal balaaran.


Ka qaybgalka qorshaynta waxaa loo is ticmaalaa isla gudaha hayaddaha daneeya qaas ahaan xaaladaha bara kaca iwm. Dadka barakacay iyo dhaqdhaqaaqa qaxootiga. Dadka gudaha ku barakacay waxay ku bara kacaan meelo xeroooyin u ek ama waxay ku darsamaan magaalooyinka ama waxay la degaan reero qaraabadooda ah. Xaaladaha qaarkood, qaas ahaan meelaha dadka qaxootiga waxay ku qasbanyihiin in ay ku milmaan dadka degan iyadoo la tixgelinaayo amaanka .wada hadal taxadir leh ee madaxda bulshada ayaa loo baahanyahay si loo helo wado wada hadal toos ah si looga dhabeeyo wadahadal dhamaystiran.

Bulshada martida loo yahay waa in laga qaybgeliyaa si ay arragtidooda uga dhiibtaan saamaynta xaalada, qaas ahaan dadka gudaha dalka ku bara kacay iyo kuwa dalkooda ku soo noqday.

Ka qaybgalka qorshaynta waxaa kaloo lagu dabiqi karaa xaaladaha dib u noqoshada, dib us dhiska iyo ka mid noqoshada mujtamaca m artida loo yahay*9.arrinka wuxuu ka bilaabanayaa wadanka qaxootiga lagu yahay inta uuna qofka qaxootiga ah uuna ku

noqon wadan kiisa hooyo. Xaaladan marka waa muhiim in laga wada hadlo arrimaha amaanka, xuquuqda iyo waajibaadka oo ay ku jiraan xaqa loo leeyahay dhulka, wadooyinka iyo howlaha kale ee loo baahanyahay marka ay soo noqdaaan dadkii qaxootiga ahaan jiray iyo in la diyaariyo ( tegis iyo soo noqosho) ay soo arkaan soo eegaan dalkii hooyo iyadoo loo diyaarinaayo haween, rag iyo dhallinyarada. Kooxaha jooga dalka hooyo waxaa wax laga ogaysiinayaa liiska magacyada ku kaydsan UNHCRta ( progress) sida ku cad ciyaalka aan qofna la socon/ kuwa ay kala tageen waalidkood iyo iyaga amd reerka ay hogaanka u tahay ayeeyo kaliya oo waalidkii ciyaalka dhalay aan la ogayn heeybtooda. Iyo in la la kulmo kooxaha baahida gaarka ah qaba si loo ogaado waxa ay qabaaan iyo kala mudnaanteeda.

Marka la qabanaayo ka qaybgalka qorhsaynta kuwa soo laabtay waa arrin muhiim ah marka la kormeeraayo waxayna wado u xaaraysaa qorhse ku salaysan baahida bulshada iyo dib uga midnoqosho bulshada ah. In la sameeyo ka qaybgalka qorshaynta mar hore waxay muhiim u tahay kaalinta garabsiinta haweenka qaas ahaan amuuraha quseeya go'aanada, waan waanta nabada iyo dib u heshiisiinta, waxay kaloo kaalin muhiim ah ka tahay horumarrinta da'da soo koraysa iyo mustaqbalka dhallinyarada.



**Tababarkan noocan ah wuxuu cabirayaa baahida bulshada u qabto caafimaadka**

## II. Mabaadiida xakamaysa

Dhowr mabda'a ayaa xakamaysa qalabkan: da'da, Jinsiga ( rag iyo dumar) iyo kala duwanaashaha *10 joogtaynta, ku salaysan xuqooqda iyo aragtida bulshada .

✓ Da'da, jinsiga ( rag & dumar) iyo joogtaynta kala duwanaasha ee UNHCRta waa istratijiyad sahlaysa sinaanta tixna gelinaysa ixtiraamka xuquuqda bino-aadamka,

qaas ahaan haweenka iyo dhalaanka iyo in la horumariyo amaanka dhamaan bulshada qaxootiga ah iyadoon loo aaba yeelin qabiilkooda, heerka bulshada ay kaga jiraan iyo waxa ay aaminsanyihiin. Istiraatijiyadan waxay ku soo duwaysaa in la helo jaan gooyn ku salaysan qatarta amaanka ka imaan karta iyo istiraatijiyad ku aadan qorshaha howlgalka qaybaha qaas ahaan haweenka iyo raga ka soo jeeda da' o kala duwan iyo waayo aragnimo kale duwan. Guud ahaan haweenka iyo kuwa laga badanyahay waxay ku leeyihiin kaalin aad uga hoosaysa arrimaha awooda siyaasada, bulshada iyo dhaqaalaha badanaabana waxaa dhacda in aanba la matalin kooxahaas marka laga hadlaayo hogaaminta rasmiga ah. Weliba waxaa dhacda in aan la tixgelin baahidooda iyo qorshahooda. Hadaba waxaa lagamamaarmaan ah in la fahmo xiriirka awooda jirta bulshada dhexdeeda sida qaas ahaan kooxaha la liido oo hadana loo takooro lagana ilaasho dhamaan qayraadka bulshada iyo go'aanada saameeeya noloshooda bulshada ay ka midka yihiin, taasoo loo sifayn karo midab takoorid.

Sababta oo ah da'dooda, dhalaanka iyo dhallinyarada iyo dadka da'da ah waxaa laga yaabaa in la takooro. Talaabo sax ah ayaa marka loo baahanyahay si loo xaqiijiyo qatarta qaaska ah ee soo wajihi karto. Si loo sameeyo ka qaybgalka qorshaynta oo sax ah waxaa lagama maarmaan ah in la tixgeliyo haweenka, dhalaanka iyo dadka da'da ah, sidoo kale dadka iyaguna leh qilaafyo ka la duwan. Si loo xadido hababka da'da iyo jinsiga ( rag iyo dumar) in lagu biiriyo dhanka bulshada inteeda kale , dhaqaalaha, siyaasada, muuqaalka loona xadido takoorka bulshada qaar ka mid ah.

✓ **Arragtida ku salaysan bulshada:** aragtida ku salaysan bulshada waxay guu baabisaa haweenka, gabdhaha, raga iyo wiilasha ka tirsan bulshada si ay uga qayb qaataan habka u ogolaanaaya in ay ka hadlaan baahidooda go'aana uga gaaraan mustaqbalkooda iyagoo ku salaynaaya bee'adda ay markaas ku nool yihiin. Waxay u baahanihiin aqoonsi in ay iyagu yihiin xubno fir fircoon ka go'aan gaarista danaha bulshadooda. Waxay kaloo qusaysaa danaha bulshada iyo kala mudnaysiinta. Abaabulka xubnaha bulshada iyo ka qaybqaadashada arrimaha amaankooda iyo qorshaynta danahooda. Waxaa xooga la saarayaa sidii garab loo siin lahaa dadka qaxootiga ah dhexdooda si ay u xalistaan mashaakilkooda. Hadaba kaalinta UNHCRta waxay tahay in ay garab siiyaan dhismaha, dib u dhiska iyo xoojinta awooda bulshad qaxootiga ah. Si looga jawaabo qatarta amaankooda iyo go'aanada in ay saamayn ku yeeshaan iyo ilaha wax soo saarka. Ka qaybgalka qorshaynta waxaa lagu sameeyaa ruux ama niyad masuuliyadeed sidii sare loogu qaadi lahaa qatarta iyo ka hortaga amaan la'aanta soo food saari karta bulshada qaxootiga ah dhamaanteed; taas ayaana muhiim ka dhigaysa arragtida ku salaysan bulshada.

✓ **maamul ku salaysan wax soo saar (RBM):** Mabaadiida bino aadamka waxay

hogaan u tahay wejiyada habka barnaamijyada qayb kasta, oo ay ku jirto jaan gooynta iyo shaandhaynta, qorshaha brograaamyada, iyo farsamaynta oo ay ku jirto( samaynta ujeedada, hadafka iyo Istratijiyada ) hirgelinta, kormeerka iyo qiimaynta. Ka qaybgalka go'aanada quseeya bulshada waa wax sah ah. Barnaamijyada oo dhan waa in ay kaalin ka gaystaan xaqiijinta quxuuqda bino aadamka iyadoo lagu dabaqaayo aragtida ku salaysan xaqa

- ✓ fahmid qaababka sababa in aan la xaqiijin xuquuqda iyo in aan la taxliilin yaa ka masuul ah xaqiijinta xuquuqdaas.
- ✓ In la falanqeeyo awooda iyo codsiga dadka xaqa leh iyo kuwa howsha fulinaaya iyo waxa ku waajib ah
- ✓ In kormeer iyo qiimayn la gu sameeyo barnaamijyada iyadoo la tixraacaayo xuquuq al insaanka iyo mabaadiidiisa.
- ✓ In la wargeliyo barnaamijyada iyadoo sal dhig looga dhigaayo talooyinka ku salaysan xuquuqda duwaliga ah ee bino aadmi nimo iyo farsamada loo maro*11.

Arragtida ku salaysan xuquuqda waxaa kaloo sal u ah mabaadiida ka qaybgalka iyo wada shaqaynta bulshada si loogu fududeeyo is bedel iyo tixgelinta xuquuqda ee ah mida shaqsiga iyo xuquuqda guud ee heerka bulshada. Sidaa darteed arragtida ku salaysan xuquuqda waa kaabaha waana arragtida bulshada waxa ay danaynayso iyo ahmiyada saareyso, waana ubucda ka ka bilaabato abaabulka xubnaha bulshada si looga qaybgeliyo ilaalinta amaankooda. Labada aragtiyoodba waxay raadinayaan abaabulka haweenka, gabdhaha, wiilasha iyo ragaba ee ka tirsan bulshada si ay uga qaybqaataan una fisiraan qatarta amaankooda qusaysa, taasoo ay ku jirto shaandhaynta iyo ka go'aan gaarista howlahooda iyo xaqiijinta xxuquuqdooda.

Marka loo eego UNHCRta xuquuqda iyo arragtida ku salaysan bulshada waxaa loola jeedaa abaabulka haweenka, gabdhaha, wiilasha iyo raga iyadoo loo tixgelinaayo dad dhamaan wada siman marka laga hadlaayo amaankooda iyo howlaha barnaamijyadooda. Iyadoo ujeedada ugu danbeeysa ay tahay in awooda bulshada kor loo qaado si ay ugu naaleeyaan xuquuqdooda.

**Habka looga qayb qaato:**

Xuquuqda iyo nolol samida bulshada qaxootiga ah iyo dadka kale ee muhiimka ah kuwaas oo wadaagaya waayo aragnimadooda waa in la ilaaliyo.sidaa darteed marka

laga hadlayo ka qaybgalka qorshaynta, qaxootiga iyo dadka ay qusayso*12.

- Waajib kuguma ah in aad ka qaybqaadato qorshaynta hadii ayna iyagu raali kaa ahayn.
- Waxaa kaa reeban in lagu shaaciyo wararka looga hadlay qorshaynta, kaas oo ku noqon kara ama kaag iyo dareen aan la jeclaysan
- Waa in lala socodsiiyo ujeedada iyo habka qorshaynta iyo in lala socodsiiyo xadka iyo xuduuda si aan loo samaynin ballanqaadyo aan jirin.
- In laga feejignaado halista iyo qatarta amaankooda ama xaalad aan ku haboonayn marka la qaybgelayo wada hadalka qorshaynta sida ( waqtiga laga maqnaanayo reerka ama shaqada iyo xusuusin dibabkii qatarta ahaa eek u soo dhacay).
- Waa in lala socodsiiyaa faa'idada ka soo bixi karta shaandhaynta iyo qorshaha kan . xogta iyo warbixinta ay bixiyaan waxay ka saacidi kartaa in wax laga qabto arrimaha quseeya xaaladahooda. Si kastaba ha ahaatee in lagu wargeliyo in ayna si toos ah wax dhaqaale ah ama faa'ido shaqsi ah laga gaareen ka qaybgalka shaandhaynta iyo qorshaynta.
- Waa in lala socodsiiyaa in warbixinta ay bixiyaan ay ahaan doonto mid kalsooni leh oo aan loo gudbinaynin cid wax u dhimaysa ka qaybgalayaasha qorshaynta iyo shaaandhaynta. Dadka qaxootiga ah waa in aan loo soo bandhigin Qatar ku timaada amaankooda iyo nabadgelyadooda guud ayna u sababin ka qaybgalkooda. Tusaale: ( kuwa ka badbaaday xad gudubka jinsiga SGBV oo lagu shaaciyo bulshada dhexdeeda, wiilasha ka qaybgalay askarta ama maleeshiyooyinka iyo mooryaanta dagaalada loo adeegsado lagana waraysanin dhibaatooyinkii ay kala kulmeen, iyo dadka ku bara kacay dalkooda gudahiisa oo ay ka muuqato duuftii dagaalka sokeeye).
- Waase in loo ogolaadaa in ay ka sheekeeyaan si xur ah naftooda iyadoo aan hadlka laga dhexgelin iyo warbixin iyagu ay bixiyeen la liidin , tusaale ( sida hadii waalidku yiraahdo waxaan ka baqi in aan caruurta u dirno iskoolka , waa in aan la waydiin sababta ay u doonan waayeen kaalmo ama taageero) sii garasho ama u danqasho la sii ogyahay waa in ay meesha ka muuqataa marka la la xiriiraay dadka ay qusayso.
- Waa in la siiyaa magacyada howlwadeenada ay la soo xiriirayaan ama howl fuliyayaasha (IPs ka ) qofka ay la xiriirayaan hadii ay qabaan arrimo u gaar ah keligood.
- Waa in lala socodsiiyaa sida uu waxtarka u yahay warbixinta ay bixiyaan iyo sida

loogu samayn karo daba galka . waa in ay ahaadaan kuwa ku xiran habkan iyo nidaamkiisa.

**Maxay muhiim u tahay ka qaybgalka shaandhaynta iyo qorshaynta:**

Marka si dhab ah loo sameeyo ka qaybgalka iyo shaandhaynta bulshada qaxootiga weliba waqti hore hadii ay suurto gal tahay kadib barakaca; waa muhiim arrimaha soo socda:

- **In la soo yareeyo takoorista qaybo ka mid ah bulshada qaxootiga,** weliba marka la samaynaayo farsamada iyo gudbinta adeega. Tusaale, dhismaha meel aan ku habooneyn xarunta ama rugta caafimaadka, ilaha biyaha laga qaato iyo ka samaynta meelo aan ku haboonayn cunto qaybinta iyo meelo ayna qaxootiga ka helayn wax isgaarsiin gaadiid ah, waayo qaar ka mid ah qaxootiga ayaa laga yaabaa in ay ku noqoto dhib iyo culays. Hadaba ka qaybgalka shaan dhaynta wuxuu kaalin ka gaysanayaa in aad loo fahmo ariimaha noocaas ka mid yihiin .
- **In la garto ama la fahmo xiriirka awooda jirta** bulshada dhexdeeda ( siyaasad, dhaqaale, jinsiga ( rag iyo dumar) ee awooda ku leh maamulka wax soo saarka (WSS) iyo kuw aan ku laheeyn . fursadaha loo haysto howlaha iyo hantida waxaa laga yaabaa in ay awood u leeyihiin koox kaliya oo qaxootiga ka mid ah ama hayadaha u qaabilsan arrimaha bino-aadamka shqaalahooda taa soo micnaheedu yahay awood sheegasho. Ka qaybgalka shaandhaynta iyo qorshaynta waxay iffin ka bixinaysaa jinsiyada ( rag & dumar) da'da, qabiilka, midab takoorka iwm wuxuuna u hogaamin karaa dhiigmiirad iyo ku takrifal bulshada dhexdeeda ah si markaasi loo qaado tilaabooyin lagu xaka maynaayo.
- **Waxaa abuurmaya tixgelin xuquuqda qaxootiga, sinnaanta haweenka iyo jinsiga ( rag & dumar)** . haweenka waxay helayaan fursad ay ku muujiyaan waxa ay aaminsanyihiin , waxaana taas ku kordhaaya awoodooda iyo fahmida xuquuqdooda.
- **Waxaa suuro gla noqonaaya ka qaybgalka dhalaanka, qaas ahaan dhallinyarada waxaana suuro gal noqonaaya in loo aqoonsado shaqsi ahaan xuquuqdooda**. Dhalaanka waxay leeyihiin mowjado ay ku cabiraan waxa ay dareensanyhiiin iyo aqoonsiga xuqooqdooda.
- **Waxaa looga sii gudbayaa saldhig xog dhab ah** . qorshaynta waxaa lagu salaynayaa warbixin dhab ah. Maa daama ay xogtu ku salaysan tahay mid ka timid bulshada qaxootiga ah iyadoo la fahmay arrimaha gundhiga u ah mashaakilkooda sinaan

la'aanta, awood qaybsiga haweenka iyo raga dhexdooda iyo dadka kale eek ala duwan, kuwaas oo door ku yeelan kara wss ( wax soo saarka) weliba ay u sii dheer tahay bulshada ku xirnaanteeda ay ku abuurayso masuuliyad iyo lahaanshaha mashruuca la fulinaayo.

- **Waxay sare u qaadaysaa xiriirka UNHCRta iyo howlfuliya yaasha mashaariicda:** howlwadeenka UNHCRta, dadka qaxootiga ah iyo howl fuliyayaasha (IPs ka ) iyo dhamaan NGOyada kale, hayadaha UNta , kuqa dowlada bulshada wadanka martida loo yahay oo ka qayb qaata habkaan ay wada dhiseen iyo fahamkiisa, lahaanshahiisa iyo masuuuliyadiisa in laga gaaro miro dhal ujeedada guud ee mashruuca si ay uga faa'idaystaan bulshada qaxootiga ah.

- **Midaynta guud iyo si cad in loo fahmo iyo natiijooyinkiisa:** wararka la soo ururuiyay loona isticmaalay habab kala duwan kaasoo laga soo xogtay kooxo kala duwan ee bulshada qaxootiga waxay ka soo rogaal celisaa aragtiyo kala duwan . waxaa la samayn karaa isku xir dhamaan qaybaha sida xiriirka buugaagta waxbarashada iyo cadada iskuulka iska dhaaftay ama la aanta nolol maalmeedka, ama dhiigmiiradka jinsiga ama uur ka ay qaadaan gabdhaha da'dooda ay yaryihiin.



**(Xog ururinta ugu horeeyso)**

***III. talaabooyinka loo baahanyahay ka qaybgalka shaandhaynta ama***

***qorshaynta***

**Hordhac**

Sida lagu cadeeyay hoos qalabkan wuxuu ka kooban yahay toban tilaabo ( 10 steps) si loo dhiiri geliyo kooxaha wada shaqaynaaya (MFT) weliba marka la diyaarinaayo iyo marka lagu samaynaayo dabagalka ka qaybgalka shaandhaynta iyo qorshaynta iyo marka la qaban qaabinaayo siminaarka ka qaybgalka shaandhaynta iyo dadka ay qusayso, howl fuliyayaasha ( IPska ) iyo xubnaha kale ee muhiimka ah.

**Talaabada 1aad: eegista xaalada lagu suganyahay**

**Talaabada 2aad: Farsamaynta kala duwanaanta**

**Talaabada 3aad: qaababka wax waydiinta**

**Talaabada 4aad: doorashada mawaadiicda**

**Talaabada 5aad: fududaynta wada hadalka**

**Talaabada 6aad: Warqada ama Nidaaminta foomamka**

**Talaabada 7aad: dabagalka wax qabadka**

**Talaabada 8aad: fahmida shaandhaynta iyo kala mudnaansiinta**

**Talaabada 9aad: diiwaangelinta shirarka**

**Taaabada 10aad: siminaarka qorshaha ka wada qaybgalka**

## Talaabada 1aad: eegista xaalada lagu suganyahay



Inta aan la bilaabin ka qaybgalka shaandhaynta iyo qorshaynta ee bulshada qaxootiga ee xaalad qaas ah. Waxaa muhiim ah kooxaha wada shaqaynta (MFT) si loo dhamaystiro dhamaan warbixinta ku tacluuqda iyo macluumaadka yaala eek u saabsan bulshada qaxootiga ah iyo bulshada martida lo yahay si loo abaabulo naftooda . kooxaha waa in ay eegaan kana wada hadlaan shaandhayntii tani ka horaysay iyo qorshaynteeda iyo dokumentiyada iyo warbixinada ku saabsan arrimaha gudaha, dhaqaalaha, siyaasada, sharciga , muuqaalka iyo nabadgelyada beey ada. Waxaa kaloo lagama maar maan ah in kooxaha ay dib u eegaan arrimaha la xiriira warbixinada UNHCRta, sida **warbixinta ku saabsan qiyaasaha caadiga ee nolosha looga baahanyahay (S&I)** , warbixin sanadeedka amaanka iyo nabadgelyada, warbixinta dalka, iyo war bixinta laga keeno ku xad gudubka jinsiga ( SGBV-ga) , tacliinta, caafimaadka, danbiisha cuntada, kormeerka iyo mashaariicda meelaha ay daqliga ka soo galaan.

Marka la eegaayo dokumintiyada , kooxaha waxaa lagamamaarmaan ah in ay maskaxda lagu hayo arrimaha soo socda kaa soo u hogaaminkaro kala sareeyn aad u balaaran bulshada qaxootiga ah waxaana laga yaabaa in ay taasi keento qatarteeda.

- Kala sareeyn raga iyo dumarka ( iyo kaalinta ay ku kala jiraan bulshada aawgeed raga iyo haweenka waxaa laga yaabaa in ay u horseedo in koox ka mid ah laga fogeeyo wadahadalka arrimaha quseeya bulshada qaxootiga ah, taas oo ka yeelaysa gabdhaha iyo dumarka in ayna ka faa'idaysanin qooyska iyo bulshadaba.
- Da'da ( bulshada qaarkeed, dhallinyarada iyo da'da cuslaatay waxaa laga yaabaa in loo xisaabo in ay ku leeyihiin kaalin aan muuqanin ku biirinta bulshada waana la xaqiraa.
- Isirka ( xriirka bulshada inta ugu baddan ama xiriirka ay la yeelan karaan bulshada martida loo

yahay.)

- Kooxaha iyo habka dhaqan dhaqaale ( kan ugu faqiirsan, kan meel shexe ah iyo midka ugu sareeya ee taajirka ah)
- Diinta ( qaas ahaan meelaha ay ka jiraan kooxo kala duwan iyo bulshada martida loo yahay.
- Tirade qooysaska/ noocooda/ tusaale ( qooys ballaaran , qooys hal waalid hogaamiyo, mid ay ciyaal uun hogaamiyaan ama qooys wada ah rag kaliya)
- Heerka wareega nolosha qaxootiga ( kuwa hada soo galay iyo kuwa mar hore soogalay, kuwa ku nool magaalooyinka iyo kuwa ku nool xerooyinka)
- Xaalada caafimaadka ( haween uur leh, haween nuujinaaya, nafaqo daro , caafimaad daro, jiro aan dhamaanayn iwm)
- Naafo ( laga yaabe in ay u horseedo takooris dhanka tababarada, fursadaha ilaha dhaqaalaha laga abuuro, iyo cunto qaybinta iwm)
- **Heerka aqoonta** ( far barashada, xirfada ay ku jirto xirfada luqada iyo kuwa aan iskuulba dhigan)
- Kuwa aan ka qaybqaadan howlaha abaabulka isu taga iyo bulshada.
- Dhulka, helitaanka hooyga, deegaanka iyo inta uu la ekaan karo , wadooyinka muhiimka ah, miraha dabiiciga ah, suuqa gudaha, howlaha qidmooyinka ah , meelaha xisaasiga ah oo ay ka dhallan karto amaan daro iwm.
- Beeqaaminta howlaha qidmooyinka oo ay kalifto beeqaaminta miisaaniyadaha ( siiba haweenka, gabdhaha, wiilasha iyo raga waxay ku reebee aafo sababta oo ah meelaha la go'aansaday in la ga jaro miisaaniyadeeda.)
- Waxaa kaloo loo aanayn karaa kala duwanaashaha bulshada qaxootiga ah iyo bulshada martida loo yahay.

Kooxahu waa in ay tixgeliyaan kaalinta ay ku yeeelan karaan arrrimahaan aaan ssosoo sheegnay weliba arrimaha amaaanka bulshada qaxootiga ah iyo dadka ay qusayso. Qaababka aan loo sinnayn oo lagu biiriyay xaalado kale sida ( caafimaad daro, naafo nimo, aqoon daro iyo cabsi guud ) waxay u horseedaysaa in ay aafato shaqsiga qaxootiga ah awoodiisa si uu u helo khidmadiisa ama uu u waydiisto xuquuqdiisa aasaasiga ah. Iyadoo la tixgelinaayo arrimahan aan soo sheegnay dokumintiga hadda jira waxay kaaalin ka gaysanaysaa in si dhab ah loo qeexo farqiga arrimaha u baaahan falanqaynta.

## Talaabada 2aad: Farsamaynta kala duwanaanta




Ka qaybgalka shaandhaynta ama qorshaynta waxaa lagamamaarmaan ah in la baadi goobo sidii looga qaybgelin lahaa kooxo baddan oo kala duwan qaas ahaan

Dadka qaxootiga ah ama dadka soo barakacay iyo dadka dalkooda ku soo noqday, si loo helo fahan guud eek u saabsan arrimaha iyaga quseeya, qaas ahaan qatarta ka imaan karta dhanka amaanka.

Si loo cadeeyo dadka danta laga leeyahay ee loo samaynayo ka qaybgalka shaandhaynta ama qorshaynta. Kooxaha waa in ay farsameeyaan tirada dadka qaxootiga ah iyo in ay kala cadeeyaan kooxaha bulshada eek ala duwan, bulshada qaxootiga waa in look ala qaybiyaa iyadoo lagu salaynaayo da'dooda , jinsigooda ( rag & dumar), qabiil, diin , xuquuqda sharciga ( qaxooti raadin, qaxooti, xubnaha aan wadanba lahayn iwm), habka dhaqan dhaqaale, heerka aqoonta, ma reer magaal baa mise waa reer miyi, xiriirka awooda siyaasadeed iyo qaabka uu u dhisanyahay( iyadoo loo tixraacayo asalada siyaasadeed oo ay ka soo jeedaan ) iyo ururo kale oo bulshadeed si ay u helaan cid matasha. Habkaan wuxuu ka saacidayaa in la ogaado kooxda bulshada ee la liiday iwm.

Hadii lagu diiwaangeliayay nidaamka ProGreska waa in la soo ban dhigo tafaasiisha tirade dadka la diiwaan geliyay tusaal dhallaaanka oo lagu diiwaangeliyay da'dooda iyo qabiilka ay ka soo jeedaan) iyo in la cadeeyo bulshada qaxootiga ah kooda aadka u liita ama qabaan baahi gaar ahaanneed sida ( ayeeyo yaal oo masuul ka ah caruur, dadka naafada ah , dhallaaanka aan lala socon iyo dhalaanka ay kala tageen iyaga iyo waalidkood.). marka laga hadlaayo qaxootiga jooga magaalada , habka diiwaan gelinta ProGreska wuxuu ka caawinaa macluumaadka ah meelaha ay kala deganyihiin bulshada qaxootiga iyo cinwaanadooda iyo halka lagala xiriiro., Farsamaynta deegaanadooda, sida ay ugu sahlantahay adeega, shaqooyinka iyo hooyga iyo amaanka iyadoo halkaa laga tilmaami karo qatarta amaankooda . markii la helo xogta farsamada deegaankooda waxay kaalin ka gaysan kartaa sidii loo arki

lahaa deegaanada kala duwan iyo sida ay ugu sahlantahay adeegyada ay u baahan karaan.

Marka bulshada laga qaybgeliyo farsamada adeega iyo habka ka qybgalka iyo tilmaamista qatarta ka imaan karta amaankooda iyo iyadoo lawada qaybsado wixii warbixin ah . kooxaha way wada fariisan karaan si wada jir ah iyagoo waraysanaaya bulshada qaxootiga ah si ay uga xog waramaan qaabka degaanka bulshadooda iyo meelaha ay degan yihiin , sida ( dadka da'da ah, dhallaanka iskuulada dhigta, iwm). Iyo meelaha laga helo adeega guud sida iskoolka, cusbitaalka, biyaha iwm.

Kooxaha wada shaqaynta (MFT) waa in ay go'aansadaan in ay wada kulmaan ka dibna ay ka wada hadlaan:

- Si gaar gaar ah kooxaha haweenka iyo raga.
- Si gaar gaar ah kooxaha dhallinyarada, dhallaaanka iyo da'da cuslaatay iyo dadka waawayn

**Kooxaha hoose oo loo kala qaybiyay dhanka da'da iyo jinsiga ( rag & dumar)**

| | Haween | Ragga |
|---|---|---|
| Dhallaaan | 10-13 | 10-13 |
| Dhallinyarada | 14-17 | 14-17 |
| Dadka da'da ah | 18-40 | 18-40 |
| Dadka da'dooda ka sarayso | 40 + | 40+ |

Nidaamka da'da ah waxaa loo sameeyay in uu ahaado marjac, waxayna u baahanyihiin in lagu habeeyo dhaqanka gudaha. Taas oo mujtamac qaxootiga ah in loo qaybiyo kooxo sida qabiilka, diinta waayo waxay ku kala duwan yihiin afkaarta iwm. Kooxaha waxay u baahanyihiin in ay la kulmaan haweenka, dhallinyarada, dhallanka raga iwm.

Farsamaynta ugu haboon waxay noqon kartaa mid kaalin ka gaysan karta imisa koox oo kala duwan ayaa jiri karta iyadoo lagu salaynaayo da'da iyo jinsiga ( rag & dumar)

Kooxahu waxaa u lagamamaarmaan u ah in ay la kulmaan:

- Kooxaha iyo shaqsiyaadka baahida gaarka ah hayso, sida ( dadka naafada ah, dhallaanka aan lala socon iyo kuwa aan lala socon.).
- Kooxaha kale ee muhiimka ah waa la soo cadeeyay ee sida qatarta amaanka. Sida waalid kaliya oo ilmo haya, dadka laga badanyahay, gabdhaha yar yar, wiilasha aan shaqo haynin, haweenka iyo raga oo aan haysanin wax daqli ah, ayeeyooyinka haysta caruur yaryar ) iyo

kooxo aan  warbixin  buuxda la ga haysanin.

Kooxaha wadashaqaynta  waa  in ay ka wada hadlaan  sida ay isu abaabulaayaan ka qaybgalka shaandhaynta  ama qorshaynta  iyo  wargelinta  qaababka  kala duwan  eee  bulshada  qaxootiga ah .  kooxaha waa in ay wargeliyaan dadka qaxootiga ah  qaas ahaan  hogaankooda  sida  golaha gudiga  qaxootiga, gudiga bulshada iyo ururada( haweenka, gudiga SGBV-ga " ku xad gudubka jinsiga ah " gudiga dhallinyarada,  aqoonyahanada iwm).  Ujeedada  howshan  iyo  hadafka laga leeyahay. Si kastaba  ha ahaatee habkan  wuxuu muujinaayaaa  in  hogaanka  bulshada qaxootiga  muhiim maaha in uu  matalo  danaha  bulshada  qaxootiga. Balse waxaa muhiim ah in  la tixgeliyo  lana raadiyo  iskaashigooda. Iyadoo u jeedadu ay  tahay  la kulanka  kooxaha bulshada  ee  kale   in  ay  thay  wax  iyaga  ka  soo  horjeeda   danahooda  iyo  hogaanka  ay bulshadooda u hayaan.  Gudiga wada shaqaynta ( MFT )    waa in ay  ka dhabeeyaaan in ay la kulmaan  qayb kasta oo  bulshada qaxootiga  ka mid ah  oon kaliya hayn  kuwa  ku xiran hogaanka  gudiga qaxootiga.

Hadaba si loo fududeeyo  dhamaan  howlaha  ku aadan bulshada qaxootiga  hadii gudiga  wada shaqaynta  ( MFT ) uu ballaaranyahay  waxaa look ala  qaybinkaraaa  qaybo  kale  Matalan  2bo 2bo   koox kasta. Waxayna  ku xirantahay  howsha gudiga farsamaynta ee la kulmaayo  bulshad qaxootiga.

## Talaabada 3aad: qaababka wax waydiinta



Qatarta  soo wajahda  amaanka  kooxaha sida haaweenka, gabdhaha, wiilasha, raga iyo  dadka da'dooda kala duwantahay  iyo waaya aragnimadooda, waxay noqon kartaa  wax murugaysan ama badanaaba aan  muuqan..  hadii la isticmaalo  habka  ugu haboon   waydiinta xaalad murugaysan  si loo cadeeyo  ama  loo fahmo  amaanka  ku taxluuqa  iyo  xiriirka awooda kooxaha  kuwaasoo ay ku jiraan  xiriirka ka dhexeeya  raga iyo dummarka, taasoo natiijadiisa ay noqon karto Qatar ku timaada  amaanka.

Marka lays waydiinaayo ka qaybgalka shaandhaynta waxaa had iyo goor ku xiran habka is maqalka, xogg ururrinta iyo taxliilinta wararka lays waydaarsado. 3da hab ee loo soo ururiyo wararka iyo taxliilkooda waa sidan:

- ✓Indha indhaynta ka qaybgalka iyo kormeerka isla markaa(participatory observation and spot check).
- ✓ Wada hadal qaab habaysan ( ama wada hadal guriga dhexdiisa ah) semi-structured group discussion
- ✓Iyo kooxaha ay qusayso wada hadalkooda

**Habab kala duwan ayaa ku haboon xaaladu kala duwan:**

Kooxaha ay qusayso waxay muhiim u tahay in la raadiyo xallinta qadiyado si guud loo danaynaayo hadana aan ku haboonayn arrimo xisaasi ah dartood sida xaaladaha SGBV*17 wada hadal qaab habaysan ( ama wadahadal guriga dhexdiisa ah) ama wada hadal qof iyo qof ama gurig dhexdiisa, ayaa ku haboon in la helo warbixin ku haboon sax na ah si loo shaandheeyo mushkiladaha , kuwaasoo aan suuro gal ahayn in ay ka soo dhex baxaan marka kooxaha ay wada hadlayaan.

Indha indhaynt ka qaybgalka iyo kormeerka isla markaa waxay gayaysiinaysaa in ay kabto warbixinta nuxur ahaan loo baahanyahay, wada hadalka kaalin ka gaysan karo xallinta mushkilada. Matalan marka la sameeynaayo cunto qaybinta, hadii indhaindhaynta ka qaybgalka iyo wada hadalka qaab hanaysan ama kooxaha ay qusayso wada hadalkooda bulshada qaxootiga ah , waxaa halkaa ka soo baxaayo ama laga heli karaa arrimo xasaasi ah. Ama marka ay koox ay u baahato in ay helaan xog intaas ka badan oo ku saabsan shaqsi , waa in ay ka wada hadlaan si gaar ah weliba ishaaraya wada hadal hal iyo hal ah, iyadoo loo samaynaayo la kulan gaar ah waqti ka baxsan shirarka xilliga hore.

Guddiga wada shaqeeya waa in ay samaystaan waqti gooraysan qodolbk a ay doonayaan in ay ka hadlaan iyo kooxda ay doonayaan in ay la hadlaan ( eeg lifaaqa 7aad Matalan). Inta jeer ee la kulmayo way kala duwanaan karaan iyadoo ay ku xirantahay qaabka, waqtiga iyo tirade ka qayb qaadanayso gudiga wada shaqaynaya.

Sida caadadu tahay xafiisyada waa in ay u diyaargaroobaan howlaha ka qaybgalka shaandhaynta muddo u dhaxaysa 2 asbuuc ilaa 3 asbuuc. Kooxaha ay qusayso ( focus group) wada hadalka waa in aysan ka baddan tiradooda 10 ruux markiiba. Markii la samaynaayo Wada hadal qaab habaysan ( semi-structured group discussion) waa in ay ka koobnaadaan hal iyo shan ruux kaliya. (tixraac hoos).

**Ku dhaqmida Habab kala duwan ayaa ku haboon waqti kala duwan:**

Kooxuhu wuxuu u sahlayaa in ay helaan arragtiyo ama odoros kala duwan eek u saabsan qatarta ka imaan karta amaanka bulshada qaxootiga ah,si loo fahmo dareenkooda bulshada

qaxootiga ah iyo waxa ay ku biirin karaan talooyinka la soo jeedinaayo waa lagama maarmaaan. Tusaale :Matalan waxaa la abaabuli karaa shir gaar ah oo looga hadlaayo aragtida ama odoroska gaarka ah ay ka qabaan haweenka ee dhinacyada qatarka amaanka. Ka dibna laga hadlo hal ilaa labo ka mid ah dumarka ay qusayso si loo helo xog ku fillan arrinta laga hadlaayo. Iyadoo hadana laysku dayaayo in warbixin dheeraad ah laga raadiyo xerada ama bulshada dhexdeeda arrintaas wixii ka jira, iyadoo laysu eegaayo warbixinta shaqsiyaadka ay bixiyeen iyo bulsha waynta waxa ay ka qabto. (FG. Aniga waxaan qabaa in marka laga hadlaayo arrimo quseeyo shaqsi in ay markasta ahaato mid qarsoodi ah, oo sida ay qabto mabaadiida UNta la ilaaliyo karaamada shaqsiga oo aan la faafin wax u qaar ah qofka aadamiga ah, qaas ahaan marka ay qofku ku soo dhaceen arrimo jinsi ah iwm).

Waxaase markasta muhiim ah in la hubiyo runnimada arrinta laga hadlaayo iyo xoqta la soo ururiyay iyo xillga la samaynaayo shaandhaynta *18 iyo qiimaynta la qiimaynaayo fahamka kooxda howsha fulinaysa.

**Habka 1aad: Indha indhaynta ka qaybgalka iyo kormeerka isla markaa**

**(participatory observation and spot check).**

Nidaamkan waa hab ama nidaam loogu tala galay in lagu kormeero xaalada ama dabeecada bulshada qaxootiga ah si loo qiyaaso waxa bulsha waynta ay soo gudbinayso, waxay kaloo abuuraysaa fursan lagu xog waraysan karo bulshada qaxootiga ah waxa ay ka tabanaayaan iyo sida ay u isticmaalaan adeegyada jira qaarkood ee sida caafimaadka, biyaha, nadaafada, waxbarashada iyo noloshooda maalmeed iwm. Waana wax muhiim ah in la garto la ogaado xaalada qatarta amaankooda oo ay adagtahay in la fahmo mararka qaarkood. Indha indhayntaas waxay sahli in la diiwaangeliyo xogtaas si wax looga qabto , tusaale, bulshada qaxootiga waa laga yaabaa in ay heeystaan u dhisanyihiin musqulo, laakinse ay ku adagtay in ay isticmaalaan dhallanka, taana waxaa la ogaan karaa marka la soo booqdo meesha ay ku nool yihiin iyo in la arko meelaha ay ku noolyihiin.

Kormeerada iyo ka qaygalka shaandhaynta waxaa laga yaabaa in uu ooda ka qaado caqabadaha horyaala bulshada qaxootiga ah siiba adeega ay haystaan ku saabsan ee sida: cunto qaybinta, caafimaadka, adeega pooliiska, qatarta amaanka iyo dhaqanka ciidanka u qaabilsan amaanka xerada iwm. Iyo weliba sida ay ula soo xiriiraan xafiisyada UNHCRta iyo kuwa NGOyada la shaqeeya, asluubta shaqsiyaadka ka shaqeeya NGOyada iyo UNta iyo isku xirnaanta guud ee bulshada. Tusaale kormeerka lagu sameeyo isticmaalka meelaha biyaha laga qaato sida iyadoo raga ka tirsan bulshada in nidaam u sameeyeen haweenka iyo caruurta iyagoo isticmaalayo nidaamka ( whip ) u qaadanaayo ulo ama wax la mid ah oo ay ku garaacaan si ay uga fogeeyaan biyo qaadashada.

Waxyaabaha la soo indha indhaynaayo waxaa ka mid ah groonada lagu ciyaaro kubada, fasalada wax lagu barto, marka la soo guraayo xaabada, suuqa, adeega gaadiidka Matalan marka la sameeynaayo dib u noqoshada meelahii laga soo bara kacay, gelitaanka xafiiska

UNHCRta, marka la waydiisanaayo qalabka looga baahanyahay nolosha guriga (NFI), iska hubinta xaalada dadka da'ada ah, haweenka uu, matalan rka leh iwm. Kormeerka waxaa kaloo ka mid noqon kara meelaha ay NGOyada ka sameeyaan adeega bulshada , qaas ahaan bulshada qaxootiga ah ee degan magaalooyinka, Matalan tala bixinta ku aadan xarumaha dadka qaba cudurka HIV/AIDS, xarumaha Hooyada iyo dhallaanka iyo iskoolada.

Kormeerka degdega ah iyo wada hadalka aan rasmiga ahayn ee xiliyada cuntada la qaybinaayo waxay warbixin wayn ka tahay helitaanka xog rasmi ah eek u saabsan xaalada ay ku sugan yhiin bulshada qaxootiga ah, qaas ahaan noloshooda maalmeed iyo sida ay u abaabulanyihiin. Hadaba marka kormeerka degdega ah lagu biiriyo ka qaybgalka shaandhaynta ama qorshaynt waxay keentaa fursad aad loogu fahmo xaalada bulshada qaxootiga ah kaalimaheeda kala duwan ee sida haweenka, gabdhaha, wiilasha iyo ragaba sida:

Sahlanaanta adeega biyaha ( yaa biyaha qaada goormeena la qaadaa)

Cunto qaybinta ( yaa miisaama, ku shushuba, ururiya, yaa qaada , yaa kormeera iyo goormaa)

Suuqa ( yaa soo iibiya yaana sii iibiya, yaa culayska badanaaba la saaaraa arrimaha qayska).

Soo ururinta xaabda( yaa soo gura, yaa soo ururiya, yaana soo qaada)

Musqulaha ( xajmigooda, yaa isticmaala dhallaanka iyo inta ay ka fogtahay guriga.

iskoolada ( yaa dhigta, yaan dhigan, boqolkiiba intee ka tahay dumar ama haween macalimiinta).

guciyada ( noocee waaye, yaa ka qaybqaato, yaa ka hadlo yaa weligiis ka aamusan).

xuriyada dhaqdhaqaaqa ( yaa dhaqaaqa, yaan dhaqaaqin).

Caafimaadka iyo xarumaha bulshada ( yaa isticmaala, yaan isticmaalin).

diiwaangelinta iyo adeega laga fududeeyo xarumaha UNHCRta iyo IP ( hayadaha la shaqeeya)

Sida badanaaba ay tahay shaqaalaha uma laha awood uu ku eego dadka, bulshada qaxootiga ah . gaar ahaan waqtiyada qaarkood sida ( aroortii hore ama habeenkii) ama meelaha berkood. Waxaa muhiim ah in la raadiyo habab lagu kormeeri karo si loo helo xog lagu kalsoonyahay eek u saabsan nolosha mujtamaca qaxootiga ah.

**Habka 2aad: Wada hadal qaab habaysan ( ama wada hadal guriga dhexdiisa ah) semi-structured group discussion.**

Wada hadalka habaysan semi- structured group discussion waxaa la qabtaa oo lagu qabtaa si koox yar ah iyo si aan rasmi ahayn iyo weliba wada hadal sal furan iyo suaalo iska furan. Waxaa kaloo loo qabankaraa si qof qof ah , ama qoys qoys ah , ama koox dad ah oo la yaqaan. Iyadoo laga duulaayo ( kooxda yar ee sida wiilasha oo loo

gaystay in lagu qasbay in ay ka qaybqaatan askarta.

Wada hadalka habaysan, wuxuu kaalin ka gaysan karaa xogta la haayo iyo ku kalsoonaanteeda iyo xaalado gaar ah sida ( xad gudub jir dil ah , iyo qatarta guriga oo lagu diriro , dhiigmiirad, xiriirka jinsiga rag iyo dumarka iyo shaqo geenta qasabka ah). Hab socodka kooxaha waxay kari karaan in ay sharaxaad ka bixiyaan , farqiga u dhexeeya iyo farsamada wada hadalka ah iyo shaandhaynta qatarta amaanka iyo ku xad gudubka si buuxda. Wdahadalka guriga wuxuu fursad siinaayaa in la soo booqdo bulshada naafada ah iyo kuwo kale ee ka ag dhow bulshadaas.

**Habka 3aad: iyo kooxaha ay qusayso wada hadalkooda**

Kooxda xooga saaraysa, waxaa loola jeedaa kooxda wada hadalka ee kartida u leh in ay shaandhayso ama fahanto arrimaha laga hadlaayo iyadoo lagu salaynaayo ama la ga amba qaadaayo kooxo isku naban ( sida jinsiga, rag iyo dumar, sannadka, qabiilka, habka dhaqan dhaqaale, iwm) la kulanka kooxo bulshad qaxootiga iyo iyadoo laga tusaale qaadanayo kuwa fududaynaaya , muhimada kaliya maaha in la soo ururiyo aragtiyo kala duwan si talan taali ah. Balse waa sidii loo kormeeri lahaa wax is waydaarsiga u dhexeeya daka kala duwan ee isu yimid. Sida ka qaybqaadashada habaysan , kooxaha xooga la saarayo markii si quman loo soo habeeyo waxay ku soo biirin karaan arrimo wax ku ool ah oo tayo leh xog ahaan iyo shaandhayn aasaasi ah ee saameeya qatarka amaanka soo wajahda gabdhaha, haweenka, wiilasha iyo ragaba. Iyo iyadoo la helaayo awooda iyo manaabiicda ka dhex jirta bulshad qaxootiga ah si loo hormarioy bulshada.

Waa muhiim in la qabto xoogana la saaro wada hadalka kooxaha si gaar gaar ah rag iyo haween oo da' kasta leh, iyadoo laga bilaabaaya 10 sanno iyo wixii ka sareeya. Sababta oo ah rag, haween , dhalaanka wiilasha iyo gabdhaha oo da'dooda is qilaafsantay iyo waayaaragnimadooda kala duwantahay dhexmarayana halis amaankooda quseeya iyo iyagoo awood u yeeshay in ay ka faa'idaystaan adeegaas .

Wada hadal kooxo gaar ah waa la samayn karaa iyadoo loo iftiininaayo in dhaqanka wanaagsan ku dayosho wanaagsan leeyahay. Iyo badbaadin dhaqameed oo isku xiran.

Iyo arrimo kale oo saamayn xubnaha bulshada ku yeelan karo.

Wada hadalka kooxada xooga la saaray waa in uu ahaadaa mid habaysan oo ku kooban suaalo kooban, taas oo dhamaystiri karta waqtiga loogu talagalay ( eeg lifaaq 3aad). Fududeeye isaga waa xubin waxaana looga baahanyahay in uu xusuusto in ayna jirin jawaab sax ah suaal kastoo la soo jeediyay sidaa darteed wada hadalka iyo waxa aan laysku afgaran dhamaan dadka ka soo qaybgalay hadana waa wax dhamaan qiime iyo tayo wanaagsan leh xitaa heerka qafka bulshada qaxootiga ka tirsan.

# Talaabada 4-aad :Dorashada Mawaadiicda





Iyadoo sal lag dhigaayo falanqaynta wadahadalada ayaa talaabada 1aad iyo qatarta amaanka ee laga dhawaajiyay , kooxahu waxay go'aansan karaan arrimaha lagala hadli karo bulshada qaxootiga ah. Arrimahaas waxaa ka mid noqon kara nolol maalmeedka, waxbarashada, kaalinta bulshada qaxootiga ah , caafimaadka, amaanka*[19], qatarta imaan karta ama arrimo kale ee soo dhashay *[20] dhamaan arrimaahaas oo dhan waxay ka muuqan karaan xiriirka awooda waxay u horseedi kartaa in laga fuquuqo koox ka mid ah kooxaha.

Arrimahaa dhamaan waxay keeni karaan qaab farsamo wada hadal , arrimaha lasoo sheegay waxay ku xiriirsanaan karaan xaaladu bulshada qaxootiga noloshooda ku xiran. Markii arrimahaas laga hadlo waxay kaloo furayaan arrimo kale eek u xiran nolosha bulshada qaxootiga ah. Tusaale: la hadalka ayeeyo qoys ay madax ka tahay, waxaa laga yaabaa in marka hore xooga la saaro arrimo ku saabsan waxbarashada ee quseeya dhallaanka ay ayeeyda u yihiin , ka dibna isu rogto arrimaha quseeya cuntada, qoryaha la shito , iyo nolosha guud iyo baahida ay u qabaan meel daqli ka soo galo, iyagoo ka cararaayo in ay dhallaankooda ay soo wajahdo in ay u shaqeeyaan iyagoon gaarin da'dii shaqada.

Dabagalka lagu sameeyo ka qaybgalka shaandhaynta wuxuu xooga saarayaa arrin ama labo arrin kaliya iyo dhibaatooyin markaa soo bixi kara marka la samaynaayo ka qaybgalka shaandhaynta iyo qorshaynta.

Ka qaybgalka shaandhaynta waa fursad qaali ah si loo helo arragtida bulshada ay qusayso iyo sidii xogta loo soo ururrin lahaa iyadoo laga soo qaadayo xogta loo yaqaan (S&I) . marba hadii la doorto arrimaha lag hadlaayo , kooxda wada shaqaynta (MFT) waa in ay soo ururiyaan xogta loo baahanyahay iyagoo marjac ka dhiganaaya xogta loo yaqaan (S&I) taasoo dib u eegis lagu sameeyey marka xiligu ahaa 1da bisha Sebteember.

Marka la fududeeynaayo wada hadalka iyo kormeerka , xogta waa in maskaxda lagu hayaa sida ay ugu haboontahay , waa in la wargeliyaa bulshada ay khusayso . taas waxaa sii raaca arrimo baddan oo ku saabsan qatarta amaanka oo la xiriira baahida bulshada qaxootiga ah qaas ahaan meelaha ay ku yar yihiin wax soo saarka. Ururinta xogta qaas ahaan arrimaha habka dhaqan dhaqaale, meelaha wax soo saarka iyo waxa dhabta ah ay bushadu ku nooshahay iyo sidii loo horumarrin lahaa fahamka iyo Isiraatijiyada ku aadan qatarta ka imaan karta amaanka .

Kooxahu waxaa haboon in ay isticmaalaan foomamka ku xusan lafaaqa 3aad si ay uga dhigtaan layli marjac ah markii ay waraysanayaan bulshada qaxootiga ah. Waydiinta la waydiinaayo bulshada qaxootiga ah su'aalahan waxay ka caawinaysaa in la helo xogta ku saabsan qatarta ka imaan karta dhanka amaanka iyo in la ogaado awooda bulshada qaxootiga ah sida ay uga hortegi karto iyo xuluushooda. Fahamka la fahmaa sida bulshada qaxootiga ah ay isaga caabin karto halista ka imaan karta dhanka amaan darida waxay sahlaysaa in kooxaha ka qaybgalka shaandhaynta ay sugaan in farsamadaan xoojinayso sidii wada jir looga hortegi lahaa qatarta ku imaan karta amaanka bulshada ay qusayso.

## Talaabada 5aad: fududaynta wada hadalka



Inta aan la bilaabin wadahadalada bulshada qaxootiga ah iyo dadka kale ay qusayso, kooxahu waa in ay dib u eegis ku sameeyaan foomka habka dareeynsiinta ( systematization form) kaa soo lagu soo bandhigay tilaabada 6aaad . foomka wuxuu ka saacidayaa kooxaha in ay sugaan xogta la soo urururiyay in lagu habeeynaayo laguna ururinaayo.

Kooxaha xooga saaraya wadahadalka

Qaban qaabada:

- In la abaabulo kulano kala gaar gaar ah oo mid kiiba ka kooban ilaa iyo toban gabdhood, toban dhallinyaro, toban haweenka ah oo da'adoodu tahay 18 ilaa 49 jir, 10 haween oo da'doodu ka sarayso 40, 10 wiil iyo 10 dhallinyaro , 10 rag ah oo da'doodu u dhaxeyso 18 ilaa 40 sanno iyo 10 rag ah oo da'doodu ka sarayso 40 sanno; ku waasoo ka kala socda qaybo kala duwan ee bulshada qaxootiga ka socota. Doorashada kooxaha ka qayb gelaayo waxay ku xirantahay fiirada loo yeeshay tilaabada 1aad iyo farsamaynta ( mapping ) loo sameeyay layliga lagu howlgeliyay tilaabada 2aad. Kulanada la xiriira haweenka ugu yaraan mid ka mid ah waa in ay ahaataa haween ( dhaqamada qaarkood, dumarka kaliya unbaa la kulmi kara dumarka, raguna raga). Haweenka iyo gabshaha caadi ahaan waxay jecelyihiin in ay la kulmaan ama la hadlaan haweenka kale sidoo kale raga iyo wiilasha iyaguna waxay jecelyihiin in ay la kulmaan raga oo kaliya.
- Howlwadeenka UNHCRta ama hayadaha la shaqeeya waa in ay wargeliyaa dadka ka qaybgelaya maalmo ka hor inta ayna bilaabanain ka qaybgalka shaandhaynta. Hase yeeshee waa lagamamaarmaan in la sii qabtao shirar is daba yaal si loo xaqiiqsado yaan si quman uga soo qaybgelaynin iyo yaa lagu daraa yaa laga tagaa wada hadalada. Arrimaha noocan ah way ku sahlantahay markii la joogo xerada. Waxaa halkaas la heli karaa dhallinyarada sida kuwa aan

markaas shaqaynin waana lala hadli karaa.

- Waa in la hubiyaa in kooxda ka socota kooxaha wada shaqeeya ( MFT) in ay ka joogaan 2bo ka mid ah koox kastaa oo dadka la waraysanaayo ay yihiin 10 qof wax aan ka badnayn ( 10 haween ah, 10 gabdho ah, 10 wiilal ah, 10 ragga ah). 2da ruux ee ka socota kooxaha wada shaqeeya ( MFT) guud ahaan mid ka mid ah wuxuu matalayaa fududeeye meesha mid ka kale uu matalaayo xog ururiye iyo iyadoo oo uu wehliyo turjimaan hadii loo baahdo. Turjimaanka waxaa lagamamaarmaan ah in loo sii sheego ama la sii tababaro nidaamka ka qaybgalka shaandhaynta qorshayaasha; arrinkan waxaa laga rabaa kooxda ( MFT) in turjimida ay noqoto weedh iyo weedh oo ayna noqon soo koobis waxa ay yiraahdeen bulshada qaxootiga ah. Kooxuhu waa in ay gacan ka siiyaan turjimayaasha, iyagoo u tartiibinaayo su'aalaha hadba mid iyo iyagoo xusuusinaayo kalsoonida looga baahanyahay wadahadalka.
- In la qaban qaabiyo meelo ku haboon oo lagu wada hadli karo, jawi dadka raali gelinaaya . in la sugo dadka aan ka qaybqaadan sida ( hogaamiyayaasha bulshada ama kuwa halqal taagista badan ee meelaha taagan ) in ayna halkaa ka dhowayn, taasoo looga baqanaayo in ay abuuraan Qatar amaaneed.
- In la wargeliyo hogaamiyayaasha qaxootiga ujeedada shirarkan
- In la abuuro bee'ad saaxiibtinimo. In ay tahay wax wanaagsan in la qabto shirarka noocaan ah iyadoo la kaashanaayo howl fududeeya yaasha.
- Meeshii ku haboon , isticmaal wax muuqaal leh sida sawirada, farsamda ( maps) looxaha, sawiro, iwm kuwaas oo si wayn saamayn ugu yeelan karo wada hadalka.
- Xadka wadahadalka in uusan ka baddan 2bo saac.

**A.Fududaynta wada hadaladda:**

- Is barasho
- Ku biloow wadahadalada isbarasho furan sida
- Kumaa tahay
- Ujeedada laga leeyahay kooxaha wada shaqaynta (PA)
- Maxay u tahay muhiim in ay ka qaybqaataan kooxaha wadashaqaynta, sharaxaad ka bixi habka ay u socoto howsha.
- Tixgeli dhowrista sirta iyo isticmaalida xogaha lagaa siiyo wadahadalka.
- Waa maxay natiijada ka soo bixi karta shaandhaynta iyo qorshaynta marka laga hadlaayo waxa la doonaayo in la gaaro ( outcome)

- Side bay ku heli karaan wixii warar ah eek u saabsan ka qaygalka wadahadalada ( eeg asluubta ka qaybqaadashada safxadda 13aad)

  Tusaale: shaandhaynta waxaa laga yaabaa in aan laga helin ilo wax ku ool ah laakin laga yaabee in laga gaaro meelayn hor leh ee ilaha wax soo saarka. Kooxaha wada shaqaynta ( MFT) waa in ay ka wada hadlaan waxa shaandhaynta furaha u ah waana in lasoo gudbiyaa marka la joogo is barashada.

- Fasax u weeydiiso in aad qaadi karto qoraal, una sharax qoraalka aad qaadayso in loo isticmaalayo xafiiska oo kaliya iyo in la diiwaan geliyo arrimaha laga dooday.
- Ka codso in isbarasho furan ay sameeyan kooxda. Tusaale waydii qof kastaa in uu sameeyo isbarid uu is barayo dhamaan kooxda inta kale isagoo/iyadoo sheegaya magaciisa, meesha uu ka soo bara kacay, Matalan( meesha ay ka timid/yimid ; hadii ayna ku tacluuqin Qatar ka timaada amaanka ! iyo mudada ay barakacaas ama qaxootinimadaas ku sugnayd iyo xaalada qoysayd.
- In la abuuro qawaaniin guud tusaale in la tixgeliyo layskuna ixtiraamo afkaarta kala duwan oo ay kala qabi karaan dadka ka soo qaygalay wadahadalka. Sideedaba majiraan jawaab qaldan. Waxaa loo baahanyahay in marba uu qof kaliya ah dadlo iyadoo aan laga dhexgeleeynin, in la ixtiraamo lana dhagaysto.
- In laysku wargeliyo dhawamada kala duwan , hadii loo baahdo qaas ahaan marka lala hadlayo dhallinyarada ( eeg safxada soo socota iyo lifaaqa 2aad eek u saabsan sidii loola xiriiri lahaa dhalaanka ).

**La xiriirista dhalaanka**

**Dhallinyarada iyo dhalaanka waa lagama maarmaan in had iyo jeer lagu daro ka qaybgalja shaandhaynta iyo qorshaynta. Gabdhaha iyo wiilahs waxay qabaan baahi , waxayna qabaan karti taasoo aad iyo aad uga mug wayn mida ay qabaan odayaasha . hadaba la xiriirista dhallaanka iyo dhallinyarada waxay leeyihiin baahi u gaar ah oo ay ka mid tahay arrimaha soo socda:**

- **Sahlanaanta dhalaanka, la xiriirkoodna wuxuu u baahanyahay qaan gaar ah tusaale waxaa lala fariisan karaa dhulka, meesha kubada ay ku ciyaaraan , ama wada socod, waxaa loo dulqaataa erayada ka soo duula oo marar ka qaarkiis uu yahay mid xad gudub ah.**

- **In la isticmaalo luqad fudud iyo afkaar ku aadan dhallaanka iyo dhallinyarada, heerka koriimadooda iyo dhaqanka guudba.**

- **In raali laga noqdo in dhallaanka iyo dhallinyarada ay leeyihiin kalmado qalbi jebis ah oo mararka qaarkiis ay adagtahay in la rumaysto ama ku cusub kuwa da'da ah . waxaa laga yaabaa in ay qaadato waqti inta laga helayo dhallaanka kalsoonidiisa oo markaas furi karta wada hadal furan oo kalsooni leh.**

- **In la fahmaa in waxa ay qabi karaan dhalaanka iyo dhallin yarada oo uu ka duwanyahay mid ka ay qabaan dadka da'da ah. Waxaa laga yaabaa in dhalaanka ay u soo gudbiyaan qadiyadooda qaab ku salaysan shucuurtooda iyo calaamado gaar ah. Waxaa laga yaabaa in ay dhowr jeer ku celceliyaa arrin dadka da'da ah aan waxba ugu fadhinin.**

- **Waxay xisasi ka yihiin arrimaha jinssiga raga iyo dumarka , dhaqanka, qabiilka iyo xiriirka awooda bulshada dhexdeeda.**

- **In la dhiiri geliyo howlwadeenka ka socda xafiiska UNHCRta / hayadaha la shaqeeya qaas ahaan kuwa xiriirka gaarka ah la leh wada shaqaynta dhallaanka iyo dhallinyarada.**

**B: arrimaha laga hadlaayo**

✓ U sheeg arrinta laga wada hadli doono, kooxaha wada hadalka .

✓ Inta aan laysku soo qaadin qatarta ay leedahay amaanka, waydii waayaaragnimada ka jirta dhinaca shaqsiyaadka ka qaybqaadanaayo ka qaybgalka ka wada hadalka (PA) iyo xooga kooxda iyo wada hadalka qaab habaysan ( ama wada hadal guriga dhexdiisa ah) semi-structured group discussion ee sida maxay sameeyaan, sida ay noloshooda ku noolaayeen intii

ayna soo qixin, yey hada la noolyihiin, xagee ku nool yihiin iyo da'dooda.

- ✓ In la sugo in qof kastaa uu fursad u helo in uu hadlo oo ka hadlo arrinka laga hadlaayo. In lagu dhiiri geliyo ruux kastaa in uu iftiimiyo xubinta uu ka hadlaayo lagana fogaado in si dhaqso ah looga baxo su'aalo loo baahnaa in aad looga fiirsado. Waa muhiim in laga feejignaado marka waraysiga uu socdo arrimaha dhaqanka ah oo xisaasiga ah.

- ✓ Waydiinta suaalo furan , sida side ?? waa maxay?? Halkee iyo sabab?? In alla intii la doono, qaas ahaan si loo cadaysto ama loo fahmo . haku xukumin dadka siday u hadlaan balse garo waxay ay ka hadlayaan.

- ✓Ka fogoow in aad adigu hogaamiso wada hadalka , suaaalaha waa in ay dhowraan wadahadalka.

- ✓ Isku day in aad kooxda u hogaamiso in ay u janjeersadaan dhanka xallinta mashaakilka qatarta ka imaan karta amaanka. Farsamada ay iyagu qabaan iyo doorka ay ka ciyaari karaan horumarrinta bulshadooda

- ✓ Sug in qatarta amaanka ee laga hadlay ay u hogaamin karto xuluul loo helo arrimahooda.

- ✓Ha kuu sugnaato in bulshada qaxootiga ah ay soo jeedsan karaan su'aalahooda iyaga qoseeya.

- ✓Waydii wadahadalka socda mushkilada ugu muhiimsan ee ay xal uga baahan yihiin.

- ✓Eeg lifaaqa 3aad, tusaale su'aalaha waydii arrinta markaas laga hadlaayo

**C.daba galka iyo tilaabada xigta**

- ✓ hadii uu jiro arrimo ku saabsan qatarta ka imaan karta amaanka la xiriirsii howlwadeenka ay qusayso ama howlfuliyayaasha UNHCRta amaba tilaabo ku haboon qaad.

- ✓ Isku soo wada gunaanud adigoo ka fekeraaya dhamaan dadkii ka qaybqaatay wada hadalka iyo waqtigii ay gelsheen adoo u mecneenaya tilaabada tan xigta iyo daba galkeeda ( eeg asluubta ka qaybgalka safxada 13aad)

Wada hadal qaab habaysan ( ama wada hadal guriga dhexdiisa ah) semi- structured group discussion.

Wada hadalka ka qaybgalka habaysan waxaa la sameeyaa si koox gaar ah oo wada hadlaysa. Inkastoo ay tahay dad kooban wadahadalkooda inta bada kooxda waxay ka koobantahay 3dex ilaa iyo 4far iyo waqti kooban, ugu badnaan saacad. Waxaana lagu qaban karaan guri, oo reer bay noqon karaan ama waxay noqon karaan dad ay ka dhexeeyso arragti midaysan. Wada hadal qaab habaysan ( ama wada hadal guriga dhexdiisa ah) semi- structured group discussion. Waxay ka dhici kartaa qof kaliya si loo ilaaliyo kalsoonida iyo sirta ama koox kooban si loo helo faahfaahin dheeraad ah ee arrinka ku saabsan iyo qatarta amaan ka ku saabsan.

## Talaabada 6aad: Warqada ama Nidaaminta foomamka



**Guddiga Arimaha Bulshada**

Kooxdu waa in ay kulmaan maalin kastaa gelinka danbe si ay dib ugu eegaan una falanqeeyaan xogta la soo ururiyay intii ay socotay ka qaybgalka iyo kormeerka .

Wada hadal qaab habaysan ( ama wada hadal guriga dhexdiisa ah) semi- structured group discussion iyo kooxda xooga saaraysa si ay u buuxiyaan foomka habaynta koox kastaa iyadoo lagu salaynaayo wixii ka soo baxay wadahadalka ( eeg lifaaqa 4aad ee faadiga ah iyo lafaaqa 4aad ee 4a , kaasoo ah mid tusaale) xogta la soo ururiyay ee kooxaha hoose . tusaale hadii ay hooyo tiraahdo gabdhaheeda ma tagayaan iskuulka sababta ay tahay waxaa u taal howl guriga ah . kooxdu waan in ay diiwaangeliyaan warbixintaas ka soo yeertay hooyada. Waxaana lagu qorayaa foomka habaynta eek u aadan gabdhaha. Waxaa sii dheer warbixinta la soo ururiyay marka wax la kormeerayo ama wada hadalka qaab habaysan waa in lagu qoraa foomka habaynta.
Markii la buuxiyo foomka ee koox kastaa ( da'da iyo jinsiga {rag & dumar} ) iyo farqiga iyo wax yaabaha ay isaga mid yihiin waxy u hogaaminaysaa in la helo qorshayn sax ah.

1. Qatarta iyo mushkilada ka imaan karta amaanka: qatarta amaanka waa tahdiidaad si dhab ah u jira, amaanka iyo xaqa ay u leeyihiin bulshada qaxootiga ah. Sida loo arko iyo waayo aragnimada ay u leeyihiin. Qatarta amaanka waxay ka imaan kartaa cabsi ama halis , xadgudub, dhiigmiirad, iyo midab takoor ama xaqiraad lagu sameeyo ashqaas ama koox.

Qatarta amaanka waxay ka dhallan kartaa la'aanta la la'yahay kaalmadii loo baahnaa oo aan jirin, agabkii iyo adeegii loo baahnaa oo maqan si nolosha caadiga ah loo helo ama isla ekaasho la'aanta oo bulshada ka xanibaysa in ay xaqooda sheegtaan. Tusaale hablaha iyo wiilasha waxaa soo food sari kara Qatar amaankooda ku saabsan sida ku shaqaysiga dhalaanka ay ku shaqaystaan askarta, gabdhaha waxaa laga yaabaa in taas ay u sii dheeraato xad gudub iyagoo jinsi ahaan loo dhiig miirto (sexual exploitation) iyo tahriibin , uur aan lagu talagelin iyo HIV/AIDs. Kooxda wada shaqaynta (MFT) waxaa lagamamaarmaan ah in ay baaraan xaaladaha iyo meelaha looga baahanyahay amaanka iyo nabadgelyada . qatarta amaanka ee la soo sheegay badanaaba waxay ka dhacdaa meelo gaar ah oo qaas ah , meelaha hayadaha, meelaha adeega, xadka ay ku dhacaysana waa in la diiwaangeliyaa.

2. Sababaha qatarta amaanka: sababaja, dib u eegis dhabta sababaha ka danbeeya qatarta amaanka. In kastoo inta baddan hal ama dhowr sababood ayna adag tahay in la carabaabo. Balse cadaynta sababaha waxay ka saacidaysaa in la sugo tilaabooyinka la qaadi karo si loo xaliyo. Matalan ku noqoshada iskoolka , mushkilada gadhaha hooyooyinka ah waa kuwo qiimo leh waana haboon tay in qatartooda loo arko in ayna tegi Karin iskoolka sababta oo ah waxay noqotay hooyo. Waxaa muhiim ah in la fahmo sababaha ah maxay tahay gabdhaha yar yar in ay uur qaadaan , in la ogaado waxa uu aaminsanyahay ninka dhallinyarada ah, uu ka aaminsanyahay guurka waqti hore la guursado iyo sida ay bulshada qaxootiga u aragto guurka da'da yar lagu guursado.
3. Awooda ay leedahay bulshada qaxootiga ay: dib u eeg awooda ka jirta bulshada qaxootiga ah, kaalinta shaqsiga bulshada ka tirsan, iyo kooxaha bulshada, awooda iyo xiriirka ka dhexeeya bulshada iyo farsamadooda iyo kartidooda, qaab bulshadeedka iyo urureed, sida ay isugu xiranyihiin iyo awoodooda , aqoontooda, iyo hayadahooda. Awooda waxaa lagu dhisaa mudo markaasay xadidaa awooda bulshada iyo sida ay uga hortagayso qatarta uga imaan karta amaanka.
4. Talooyinka ay soo jeediyaan bulshada qaxootiga eek u saabsan sidii looga hortegi lahaa qatarta amaanka:kooxahu waa in ay diiwan geliyaan xuluusha la soo jeediyay oo ay soo jeediyeen reaga iyo dumarka, dhalaanka, dhallinyarada, gabdhaha iyo wiilasha iyo da'da dadka ah taasoo lagu cadeeyay awooda jirtaa ee bulshada. Waa in la ogaadaa hadii ay bulshada ay danaynayso in ay waqtigeeda u hurto si iskaa wax u qabso ah. In la habeeyo, la abaabulo kooxo bulshada ka mid ah oo doona xuluusha, lana sameeyo wada shaqayn ka dhexaysa howlaha ay fulinayaan UNHCRta iyo hayadaha la shaqeeya, dowlada iyo talooyinka iyo isbedelada la doonaayo in bulshada qaxootiga. ( eeg lifaaqa sfxada 13aad)
5. Arrimaha ugu muhiimsan ee ah in la xaliyo: maxay yihiin waxa ugu muhiimsan in si dhaqso ah loo xaliyo sida lagu cadeeyay kooxaha hoose ( da'da iyo jinsiga {rag & dumar}) waxayna u baahanyihiin dareen gaarah.
6. Xubnaha ka tirsan kooxaha waxaa u lagama maarmaan ah marka laga doodaayo warbixinada lagu kala dhigaayo shaxda kala duwan ee foomka habeenta sida looga sheekeeyay qodobada sare. Xogta waxay u baahantahay in la diiwaan geliyo koox kastaa ( da'da iyo jinsiga) loona soo abaabulo wadahadalada qaaba ku aadan arrinta markaas laga hadlaayo, waqtiga iyo meesha wada hadalka, meesha lagu kulmaayo iyo kooxda xooga la saaraayo iyo habka la isticmaalay

waa in la diiwaan geliyaa.

## Talaabada 7aad: dabagalka wax qabadka



Layliga Daba galka ka qaybgalka waa wax muhiim ah waana talaabada ugu horaysa. Waxay bulshada qaxootiga aha u sahlaysaa in ay gartaan in la dhagaystay arragtidooda isla markaana tixgelin lagu samaynaayo sidii wax looga qaban lahaa. Xitaa hadii ay miisaaniyad yari jirto . mida labaad dabagalka wuxuu sahlaayaa in ay furmaan qaabka wada hadalka ee kadhaxayn kara bulshada qaxootiga aha iyo kooxaha howsha wada jirka ah (MFT) waxaa halkaas ka soo baxaaya is dhaafsiga warbixinada iyo( asluubta ka qaybgalka eeg boga 13aad) iyo in ay abuurmato isku kalsoonaan dhanac waliba ah mudo ka bacdi, mida 3aad dhaqan socod wanaagsan ee kooxda wax qiimaynaysa iyo war bixinada iyo xogta.

Kooxda wada shaqaynta waxaa waajib ku ah:

1. In ay qaado talaabo degdeg ah , meeshii suurto gal ah , in wax laga qabto arrinta qusaysa qatarta amaanka. Qax ka qabad ku aadan ( fariinta ku haboon in laga bixiyo , warbixinta oo la wadaago, in laga qayb galo arrimaha ku xadgudubka jinsiga haweenka, caruurta iwm qaas ahaan kuwa u baahan arrimo gaar ah, in gacan laga gaysto talooyinka bulshada qaxootiga a, lagala xaajoodo arrimahooda hayadaha howlaha UNHCRta fuliya, iyadoo lagu hirgelinaayo dhanka da'da, jinsiga {rag iyo dumar}, wacyigelinta iyo xaq dhowrista afkaarta kala duwan iwm). Arrimahaa oo dhan waxay samayn karataa isbedel wayn ee quseeya arrimaha qatarta amaanka ka imaan karta. Marka howshaan ay soo dhamaato maalinkaas, kooxaha wada shaqaynta waxay soo gudbin karaan dhamaan arrimaha u baahan dabagalka iyo sidii wax looga qaban lahaa, arrimaha aan u baahanayn maal gelin ballaaran waxaa layska waydaarsan karaa macluumaadka ku saabsan.


2. U feker si wax looga hortago, kuna dabaq talaabooyin ka kortag leh. Hadiise ay jiraan ishaarooyin ruux ama koox ay ku sugan yihiin halis dhanka amaan kooda ah.

3. Dabagal iyo oofin iyo heshiisyo in la sameeyo. Qiyaas laga soo sameeyay xarun waxay fursad u tahay

in laga bilaabo abaabul bulshada qaxootiga dhexdeeda iyo hayadaha kale ee xarumahaas jooga. Dabagalka nafsad ahaan tiisa waa qaab kormeer lagu ogaan karo meesha ay wax marayaan iyo arrimaha ay qusayso bulshada qaxootiga ah iy ballan oofinta.

4. In xaalada looga warbixiyo bulshada qaxootiga ah. Ka dib markii la soo gebo gebeeyo ka qaybgalak shaandhayta iyo qorshaynta, kooxaha wada shaqaynta (MFT) waa in ay is ku af gartaan qaabka lagu wargelinaayo bulshada qaxootiga ah iyadoo lagu wargelinaayo dhamaan wixii ka soo baxay ka qaybgalka shaandhaynta qorshaha fog iyo kan dhowba iyo tilaabada ku xigta ee la qaadi doono iyo waxa xadidaaya.waa in si kooban loogu sheega qaabka dhismaha bulshada, sida ururka haweenka, ururka dhallinyarada, qaabka hogaanka ( rag iyo dumar) is la markaana la sugu in warbixinta la gaaarsiiyo bulsho waynta qaxootiga.

## Talaabada 8aad: fahmida shaandhaynta, natiijada iyo kala mudnaansiinta



Tilaabadan waxay u baahantahay abaabul iyo shaandhayn la shaandheeyo war bixinada la soo ururiyay sida ku cad foomka qaabaynta. Inta aan la soo gaarin gebogebada ka qaybgalka layliga shaandhaynta. Iyadoo la ogyahay in tilaabada 6aad ay ka koobantahay diiwangelinta warbixinada laga soo ururiyay bulshada qaxootiga iyo sida ay wax u arkaan. Hadaba shaandhaynta lagaga hadlayo tilaabada 8aad waa dhamaan howlahii kooxaha wada shaqaynta (MFT) iyo sida ay wax u arkeen waxaana kaalin ka gaysta nidaamka loo yaqaano 3ddex geesoodka, kaasoo ay tahay in xogta laga eego dhinacyada kooxaha iyo isiro kala duwan.

Xubnaha kooxda waxay shaandheenayaan xogta lagu soo gudbiyay foomka habaynta iyo kala mudnaysiinta iyo midka u baahan in degdeg wax looga qabto iyo talooyinka laga soo jeediyay wax ka qabadkooda iyo xuluushooda iyadoo lagu salaynaayo da'da iyo jinsiga ku salaysan ka qaybgalka shaandhaynta la soo sameeyay. (warbixinta kala mudnaysiinta, eeg lifaaqa 5aad) sidaa darteed wax lumaayo ma jiraan marka la samynaayo qorhsynta. Gudiga wada shaqaynta waa in ay soo ururiyaa qodobada muhiimka ah marka layliga socdo kaa soo koox

waliba ka sheegatay ama ka warbixisay saameeyana xaga da'da, jinsiga iyo afkaarta kala duwan iyo mudnaansiinta UNHCRta . sida la ogyahay UNHCRta waxaa ka saran masuuliyad in ay ka fiirsato xuquuqda qof , inta badan kala mudnaysiinta arrimaha bulshada qaxootiga waxay ku qaldaan arrimo shaqsi ah. Kooxuhu waa in ay iska hubiyaan in UNHCRta ay tilaabadeedu tahay wax ka qabadka ku xadgudub xuquuqda qaxootiga sida ( halis, xadgudub jinsiga ah, dhalaan aan lala socon ama dhalaan ka cararay reerkooda ama dadka da'da ah oo cid la jirtaa ayna jirin, guurka dhallaanimada lagu guursado iwm).UNHCRta waxaa shaqadeeda ka mid ah inay abaabusho bulshada qaxootiga ah qaas ahaan arrimo gaar ah oo ay na u arkin in ay muhiim tahay ( eeg habraaca ku salaysan dabaqaada howgalada ku began UNHCRta : manual for applying a Commuity based approach operations).

Hal foom waa in uu haystaa guddi hoosaad kastaa ( da'da iyo jinsiga) iyo kooxuhu waa in ay iska sugaan ka la duwanaashaha afkaarta.

1) Qatarta amaanka : kooxaha hoose ( da'da iyo jinsiga)

Dhamaan foomamka habaynta waxay u baahanyihiin in la shaandheeyo oo ay shaandheeyaan kooxaha hoose ( sub-groups) sida lagu cadeeyay layliga tafatirka (mapping exercise) loona habeeyo iyadoo la tixraacayo da'da, jinsiga sida ku xusan shaxda tilaabada 2aad.

- Shaandhaynta qatarta amaanka : kooxuhu waxay u baahanyihiin amaan darada la soo sheegay oo ay soo gudbiyeen kooxaha hoose iyadoo ay ku salaysanthay da'da, jinsiga yo kala duwanaashaha afkaarta . waa in ay tixgeliyaan side ama habkee haweenka, gabdhaha, wiilasha oo dhamaan aragtiyadoodu kala duwanyihiin iyo waayo argnimadooda waxay koox waliba uga sheekaynaysaa sida ay iyagu wax u arkaan . sida Qatar qaas ah oo tabanaysa koox gaar ah ( sida habka dhaqan dhaqaale, laanta qabiil ay ka soo jeedaan, lahjadooda, iyo diinta ay aaminsanyihiin) waxaa loo baahan yahay in si fiican loo derso . waxaa kaloo lagama maar maan ah in la eego oo la derso halka ay wax u socdaan , mushkilada caam ka ah iyo meelaha ay qatarta ka imaan karto iyo in laysku raaco in lagu sameeyo daba gal iwm. Kooxuhu waa in ay shaandheeyaaan xogta la soo ururiyay iyadoo la eegaayo xuquuqda lagau xad gudbay , xitaa hadii ay bulshada qaxootiga ayna ka soo sheegan.

---

✓ Si gudo gal ah taxliilinta ku aadan qatarta amaanka iyo kala mudnaysiinta waxay sahashaa ka la mudnaysiinta dhibta ugu qatarsan ee koox kastaa ( da'da iyo jinsiga) kooxuhu waxay ku dhigayaan arrimahan sanduuga 2aad ee foomka warbixinta ka qaybgalka shaandhaynta iyo kala mudnaysiinta ( eeg tilaabada 9aad)

---

- Dib u eegis xuquuqda lagu xad gudbay : kooxdu waa in ay cadaysaa qatarta amaanka u baahan in muhimad la siiyo , iyo xuquuqda la gu xadgudbay. Tusaale; dugsiyo aan ku filneen , mushkilad ka hortaagan tacliinta loo baahanyahay iyo ku xadgudubka jireed sida marka cuntada la qaybinaayo iwm.

---

- ✓ Kooxaha wada shaqaynta (MFT) waa in ay qoraan xuquuqaha lagu xad gudbay kuna qoraan sanduuqa 1aad ee warbixinta ka qaybgalka kal mudnaysiinteeda.

---

Asbaabta iyo taxliilinta: kooxuhu waa in ay dib u eegaan asbaabta qatarta amaanka sida ay u soo bandhigeen bulshooyinka qaxootiga ah, iyo weliba cida ka masuul ah, si qof qof ah iyo kooxda wadashaqaynteeda iyo waxyaabaha ka dhiman qaybta barnaamijka iyo qaybaha aan si hufan loo qeexin wax qabadkooda. Kooxuhu waa in ay qiyaasaan halka ay mowjadu u socoto iyadoo laga dhex helaayo arragtida bulshada qaxootiga ah ( da'da iyo jinsiga ). Waxaa kaloo lagama maar maan ah in la taxliiliyo waxa dhallin karo natiijo la taaban karo. Maxaa ka mid ah waxa ka dhallan karo sababaha farqiga da'da iyo jinsiga iyo noocyada midab takoorka. Asbaabta qaarkood waxaa laga yaabaa in ay raal ama sal ku leedahay dhaqankii wadankii hooyo sidaa darteed kooxda wada shaqaynta waxaa looga baahanyahay in ay u kuur galaan arrimahaas iyo waxa la soo xiriira si loo baabi'iyo midab takoorka iyo waxa la xiriira Qatar gelinta amaankooda.

---

- ✓ Sanduuqa 3aad ee ka qayb galka shaandhaynta ee foomka ka la mudnaysiinta. Kooxda waxaa looga baahanyahay in ay diiwaan geliyaan sababaha qatarta ka imaanaysa dhanka amaanka.

---

2) Awooda iyo xuluusha ay soo jeediyeen kooxaha hoose ( da'da iyo jinsiga)

- Awooda taxliilinta: kooxuhu waa in ay tixgeliyaan awooda ay bulshada qaxootiga leedahay raga haweenka waana in la fahamsiiyaa in dhamaan sida ay uga hortegi karaan halista amaan darida iyo waxa keena xaaladaha qaar kood bulshada qaxootiga ah waxay leeyihiin awoodii wax lagu xallin lahaa balse waxay u baahan yihiin abaabul iyo awoodooda oo la dhiso iyadoo loogu deeqayo wixii lagu taakulayn karo si ay iyagu iskood wax isu taraan , oo markaa ay ka faa'idaysan karaan haweenka, raga, gabdhaha, wiilasha iyo kooxaha kale ee ka tirsan bulshad qaxootiga ah . si loo xxaqiijiyo taas waa in loo ogolaadaa in ay ka qaybgalaan . U adeega yaasha UNHCRta horey uga shaqaynayeen ulana shaqaynayeen bulshada qaxootiga waxayna ka kasbadeen waayop aragnimo dheeraad ah sidii loo xallin lahaa mashaakilka jira ee ka jira

bulshada qaxootiga ah.

- Taxliilinta xuluusha: xuluusha la soo jeediyay oo ay soo jeediyeen bulshada qaxootiga ah waa in loo eegaa sidii loo xallin lahaa arrimaha ay ka hadleen si loo xadido halista ka imaan karta nabagelyo darida. Iyo meesha ay bulshada qaxootiga iska caawini karto, abaabulka bulshadana waa in uu ahaadaa mid xadidan sida marka loo baahan yahay in la soo dhexgalo kaliya. Xaaladaha qaarkood bulshada qaxootiga ah hore ayay u garanaysaa in ay ka hortagto halista uga imaan karta amaan darida. Si kastaba waxaa muhiim ah in had iyo goorba kormeer joogto ah lagu sameeyo si ayna halkaa uga dhicin dhiig miirad iyo ku xad gudub xuquuqda . tusaale caadooyinka bulshada qaxootiga ah iyo takoorista . waxaa kaloo laga yaabaa in uu dhib ka taagan yahay fulinta adeega loo qabto bulshada qaxootiga ah tusaale dadka da'da ay oo aan soogaaari Karin rugta caafimaadka, dhalaanka waxaa laga yaabaa in ay iskoolka tegin iyagoo waalidkood u raadinaaya wax ay ku wada noolaadaan . UNHCRta, Kuwa la shaqeeya iyo hayadaha kale ee ku sugan halkaas waa lagama maar maan in ay raadiyaa xuluul looga hortago arrimaha noocaan ah. Si kastaba ma haboona in arrimahaas looga tago qaxootiga in ay iyagu xalistaan. UNHCRta waxaa looga baahanyahay in ay sare u soo qaado awooda bulshada qaxootiga ah.

✓ Kooxda wada shaqaynta waxay ku diiwaan gelinayaan sanduuqa 4aad dhamaan awooda bulshada qaxootiga ah iyagoo kala mudnaysiinaaya sanduuqa 5aadna waxay ku diiwaan gelinaayaan wixii xuluul ah oo ay soo jeediyeen bulshada qaxootiga ah.

---

3) Hadafka amaanka: kooxda wada shaqaynta waa in ay bilaabaan in ay habeeyaan hadafka amaanka oo ku salaysan qatarta ka imaan karta amaanka oo si guud looga hadlay, sababaha, xuquuqda lagu xad gudbay ama aan la xaqiijin iyo awooda ay leeyihiin bulshada qaxootiga ah.

---

✓ Sanduuqa 6aad ee hoos taga hadafka amaanka , kooxuhu waa in ay ku diiwaan geliyaan hadafka amaanka laga leeyahay oo ay soo bandhigeen markii la ga qayb qaadanaayay siminaarka ka qaybgalka shaandhaynta .

---

***Talaabada 8aad :*** waxaa la diyaarinaaayaa siminaarka kooxda wada shaqaynta , kaasoo koox kastaa eey eegayso qatarta ka imaan karta amaanka bulshada qaxootiga iyagoo maskaxda ku haya waxa soo kordhay iyo waxa taagan iyo dokumentiyada looga hadlayo horumarrinta iyo qorshaha howlgalka wadanka .

Xogta lagu soo bandhigo warbixinta kala mudnaysiinta ee lafaaqa 5aad ayaa loo islicmaalayaa saldhiga horumarinta qorshaha iyo istaraatijiyada howlgalka ( waa amaan gelinta iyo taakulaynta ) ee lagu soo bandhigay siminaarka ka qaybgalka shaandhaynta oo lala sameeyo bulshad qaxootiga ah. Waa in ay ka muuqataa hadafka howgalada iyo qaabka barnaamijyada loogu tala galay sannadka waxaana lagu soo gebo gebaynayaa kulanka ka qaybgalka

qorshayaasha.

## Talaabada 9aad: diiwaangelinta shirarka



Diiwaan gelinta la diiwaagelinaayo xubnaha ka soo qaybgalay shaandhaynta da'dooda ,jinsigooda ee qabiiladooda iyo wixii macluumaad ah oo xog ah ee laga heli karo waxay kaalin wax ku ool ah ka gaysanaysaa howsha. Qaabka noocan ah ee lagu diiwaan gelinaayo xogtii la soo helay waxay wax ka taraysaa qorshaha howlgalka wadanka iyo warbixinta arrimaha amaanka ee sanadlaha ah. Shaxda ku taal lifaaqa 6aad iyo lifaaqa 6aad(a) wuxuu inoo faahfaahinaayaa sida loo diiwaan geliyay warbixinada iyo cadada , tirada dadka ka soo qaybgalay iyo qodobada kala duwan ee laga soo hadlay.

## Talaabada 10aad: siminaarka qorshaha ka wada qaybgalka



Faafinta ka qaybgalka shaandhaynta iyo qorshaynta UNHCRta – waa haggis wax ku ool ah oo ka saacidaaya xafiisyada marka ay diyaargraynayaa qaas ahaan marka la

samaynaayo siminaarka ka qaybgal sanadeedka si loo horumariyo howlgalada heerka wadameed ah . hab raacan wuxuu muhiim u yahay xitaa hayadaha howlsha kula jira UNHCRta . habka iyo hanaanka ka qaybgalka shaandhaynta waxay ka saacidaysaa sidii loo soo bandhigi lahaa ama loo diyaar garyn lahaa kooxaha bulshada qaxootiga ka tirsan sidii ay uga qayb qaadan lahaayeen .

Marka la dooranaayo xubnaha bulshada qaxootiga ka tirsan: iyadoo la kaashanaayo dhamaan kooxaha wadashaynta (MFT) , bulshada qaxootiga, dadka barakacay, iyo kuwa ku soo noqday dalkooda ayaa waxay iska dooranayaan xubno matali kara oo ka kala kooban da'da iyo jinsiyada kala duwan iyo kuwa afkaarta ku kala duwan iyo waayo aragnimada. In ay wada siman yihiin raga iyo dumarka iyo in ay karaan in ay ka qayb qaadan karan. Xubnaha ka qayb qaadanaaya waa in laga saacidaa doowrka ay ku yeelan karaan siminaarka. Si looga fogaado dad si gaar ah loo soo xushay oo ka qaybgala kaliya.

Wadahadalka ka qaybgalka shaan dhaynta iyo kala mudnaysiinta: warbixinta la soo ururiyay , la shaandheeyay lana habeeyay marka la samaynaayo ka qaybgalka shaandhaynta waa la wadaagayaa wadahadlka, weliba marka la samaynaayo siminaarka ka qaybgalka shaandhaynta. Waxyna ka mid noqonaysaa kaalin muhiim ah arrimaha guud ee laga wada hadlaayo. Kaalinta maamulka howgalka ( Operations Management Support software) furaha ugu muhiimsan UNHCRta waa habaynt hayadeenta ee loo yaqaan Maamulka ku salaysan hadafka (Result-Based Management ) wuxuu soo koobayaa xogta laga soo helay ka qaybgalka shaandhaynta iyo kala mudnaan siinta. Waxaa halkaas laga samay nayaa ahdaaftii howgalka wadanka iyo sidii loo soo gudbin lahaa mashaariicda la doo naayo in la fuliyo.

Kooxda wada shaqaynta ( MFT) wejigiisa 2aad waa sidii looga hortegi lahaa wadahadalkii ka soo baxay howgalka mashaariicda wadanka . marka ugu horaysa in la sugo wixii ka soo baxay ka qaybgalka shaandhaynta lana tixgeliyo. Tan 2aad in la hubiyo shaandhaynta ku jaan go'an da'da, jinsiga iyo kala duwanaanta afkaarta iyadoo sal dhig looga dhigaayo qatarta ka imaan karta amaanka iyo gargaarka kale.

Iyadoo si fiican loo fahansanyahay xiriirka awood qaybsiga bulshada qaxootiga iyo sida loo takooray qaar ka mid ah bulshada. In la hubiyo in ay xuluusha ay xalinayso arrimaha amaanka si la hubo qaas ahaan haweenka iyo dhalaanka.

Istiraatijiyada amaanka , warbixin sanadeedka amaanka, warbixinta wadanka iyo howgalada wadanka ayaa dib loo eegayaa iyadoo maskaxda lagu hayo taxliilka ku began amaanka iyo warbixintii laga soo ururiyay ka qaybgalka shaandhaynta iyo qorshaynta. Taxliilkaa wuxuu sal dhig u yahay dhismaha da'da, jinsiga iyo kala duwanaashaha afkaarta si loo helo awood lagu saacido haweenka, dhalaanka, wiilasha, raga loona garab siiyo sinaanta aadanaha ka dhexeysa.

**IV. gunaanud**

Habka iyo nidaamka la soo bandhigay waa qalab loogu tala galay in lagu qabto ka qaybgalka shaandhaynta iyo qorshaynta taasoo ku wajahan dhowr meelood sida amaanka iyo in laga saacido korkmeerka howl maalmeedka mashaariicda. Waxaa kaloo loo isticmaali karaa in lagu sameeyo shaandhayn qaas ah iyadoo la isticmaalayo qalabkan sida wax barashadda, caafimaadka, HIV/AIDs,nafaqada iwm.

Marka la qabanaaayo ka qaybgalka shaandhaynta kooxaha howlaha ka qaybgelaya (MFT) waxaa la soo hor dhigayaa arrimo fara badan ee quseeya bulshada qaxootiga ah, qaas ahaan kuwa la takooray oo laga yaabo in ay qabaan arrimo gaar ah una baahan in si degdeg ah wax looga qabto si loo dhiso kalsooni dhexmarta xubnaha bulshada, howlwadeenka mashaariicda taassoo u baahan waqti ku filan . arrimahan waxy howlwadeenda u sahlaysaan in ay hore ugu kuur galaan mashaakilka jira, kana abuurmo wadahadal wax xalis ah. Waxayna qayb ka tahay dhismaha kalsoonida ee bulshada dhexdeeda iyo howlwadeenka.

***Ka qaybgalka shaandhaynta iyo howgaladda***

***Lifaaqyo 5 ah***

***Lifaaqa 1aad: qatarta amaan filawaa.***

**Qatar guud**

- ✓ **Takoorka jinsiga ku salaysan**
- ✓ **Midka da'da ku salaysan**
- ✓ **Xilliga qaxootinimada la soo galay ( kuwa cusub, kuwii mar hore yimidiwm)**
- ✓ **Habka – dhaqan – dhaqaalef( gaajo, faqri, iska ladan iyo daqli sare.)**
- ✓ **Qabiilka ( iyo awooda xiriirka kooxaha awooda leh ee bulshada martida loo yahay)**
- ✓ **Diinka ( kala duwanaashaha siiba bulshada martida loo yahay)**
- ✓ **Qalabka guriga yaala( reer balaaran, hal waalid, ayeeyo reer ay hogaamiso iwm).**
- ✓ **Nooca deegaanka, xero ama magaalo( masaafada ay u jirto poliiska, iskoolka , rugta caafimaadka iwm).**
- ✓ **Xaalada caafimaadka ( nafaqo daro, bokaan socod, cudur ku raagay, naafo iwm).**
- ✓ **Heerka aqoonta ( waxbo ma yaqaan, farsamo aqoon, luqadaha iwm).**
- ✓ **Hab nololeedka, iyo awooda loo leeyahay adeega iyo wax soo saarka iwm).**

**Qatarta jireed**

- ✓ **Dib u celin ( tarxiilka )**
- ✓ **Xarrig aan geed loogu soo gaban .**
- ✓ **Garaacis iyo afduub.**
- ✓ **Degaan aan ku haboonayn aadamiga, kulayl xadka ka baxsan iyo arad xumo.**
- ✓ **Cunto xumo iwm**
- ✓ **Biyo aan ku filnayn mid la cabo iyo mid la isticmaalo toona.**
- ✓ **Qoryo ama dhuxul aan ku filnayn**
- ✓ **Halis ku timaada caafimaadka, cuduro faafa iwm.**
- ✓ **Qatarta siyaasada .**
- ✓ **Xad gudub qofka lagu xad gudbo sida jinsiga ama dhiigmiirad ku salaysan jinsiga iwm.**
- ✓ **Si xoog ah ku shaaqaalaysiin askarta.**
- ✓ **Kufsi ka dhacaa xerada ama magaalada, markii la soo baxsanaayay, marka la soo gaaro wadankii loo soo baxsaday iwm.**
- ✓ **Dagaalada ka dhaca guriga dhexdiisa, xad gudub iyo inkiraad iwm.**
- ✓ **Uur ku yimaada ruuxii oo weli dhalaan ah.**
- ✓ **Halis ka timaada dabeecada sida dab, fatah , dhul gariir, iwm.**
- ✓ **Tahriibin iwm.**

**Qatarka arrimaha bulshada**

- ✓ **Aqoonsi laa'aan iyadoo ay maqan yihiin dukumentigigii aqoonsiga ee sida ( teesaraha, dhalasho, guurka,iwm).**
- ✓ **La'aanta diiwaan gelinta .**
- ✓ **Takooris bulshada takoorto.**
- ✓ **Xad gudubka iyo dhiig miirad ku salaysan jinsiga**
- ✓ **Takoor ku salaysan jinsiga, da'da, diinta, qabiilka, iyo ku xirnaan siyaasad gaar ah,**
- ✓ **Halis loo noqdo dhiig miirad, qaas ahaan dhalaanka , dhallinyarada, dhalaanka aan lala socon iyo caruurta ka carartay waalidkood.**
- ✓ **Kala saarista gabdhaha iyo wiilasha gurigooda dhexdiisa.**
- ✓ **Fursada iskoolka iyo waxbarashada oo ka xiran.**
- ✓ **Naafo nimo.**

**Halista dhaqaale**

- ✓ **Adeega nolol maalmeed oo aan jirin.**
- ✓ **Waalidka kaligii ah oo ciyaalkiisa ilaaliya uuna Karin in uu banaanka u soo baxo oo shaqo raadsado.**
- ✓ **Farsamo shaqo la'aan oo nolosha sii xumaysa.**
- ✓ **Dhiigmiirad ay sameeyaaan dadka dalka is kaleh.**
- ✓ **Dhiigmiirad ay sameeyaan saraakiisha wadanka.**

**Halista ka imaan karto gudashada la xiriirta dhaqanka**

- ✓ **Sida gudniinka, guurka waqti hore, yarada iwm.**
- ✓ **Cadaalada dhaqameed iwm.**

**Lifaaqa 2aad: la xiriirka dhalaanka.**

Waa iska caadi in loo qaato guud ahaan dhalaanka in ay ka warhayaan waxa guud ahaan dhacaaya amaba aad bay u yar yihin in ay fahmaan waxa socda balse ay la kulmaan arrimo Qatar ah . si kastaba ha ahaatee dhalaanku sida dadka waawayn waxay leeyihiin mowjado ay ku fisiraan naftooda *22

Hadaba la xiriirista gabdhaha iyo wiilasha da' kastaa ha ahaadeene iyo waayahooda oo kala duwan waxay noqon kartaa arrin Qatar ah una baahan farsamo gaar ah la xiriiristooda.

As luubta ku saabsan kalsoonida ay bixiyaan gabdhaha ama wiilasha way kala duwanaanaysaa iyadoo saldhigu yahay dhaqamada ay ka kala matalaayaan .

hadaba dhaqanka ka la duwan aawgiis koox kastaa ama shaqsi kastaa waa in uu ka war hayaa ka hor in ta uuna dhicin iyo ka dib marka la qabto ka qaybgalka shaandhaynta.

Marka lala hadlaayo dhallanka tixgeli:

- ✓ Ka samayso saaxiib, jawigana ka yeelo mid aan rasmi ahayn, talo waxaa loo soo jeedinayaa kooxda samaynaysa ka qaybgalka shaandhaynta in ay bartaan in ciyaalku ay dhihi karaan waxay rabaan.
- ✓ Kooxdu waxay kaloo u sheegi karaan meesha ay ka socdaan oo is bari karaan. Sida ciyaal baan leeyahay waxay joogaan gurigaiwm.
- ✓ In ay lahaadaan wax waayo aragnimo ah la shaqaynta dhalaanka.
- ✓ Sii garo waxa loo baahanyahay in xal laga gaaro. Sida daawada, waxaa kaloo lagama maar maan ah in ay sii sameeystaan xeer ay isku hogaamiyaan marka uu wada hadalka socdo.
- ✓ Waxaa wanaagsan in rag iyo dumarba ay wada socdaan marka lala shaqaynaayo dhalaanka in kastoo ciyaalka qaarkood ay jecelyihiin in ay la hadlaan jisigooda kaliya rag ama dumar kaliya.

**Kooxdu waa in ay tixgelisaa arrimahan markii ay la xiriirayaaan dhalaanka:**

- Hadii ciyaalku u muuqdaa kuwa cabursan raadi qabiir.
- Kooxdu waa in ay sii fahamtaaf waxa ay ka doonayaa dhalaanka .
- Kooxdu waa in ay ka haystaan fasax waalidka dhalaanka ay waraysanayaaan. Sidoo kale dhalaanka ka qaybgalkooda waa mid ku dhisan iskaa wax u qabso.
- Kalsoonida iyo sir ta wada hadalka waa in loo sheegaa dhalaanka la waraysanaayo .
- Waa in la tixgeliyaaa aragtida dhalaanka ay soo gudbiyeen.
- Dhalaanka qaarkood waxaa laga yaabaa in ay u hadlaan waxa dadka waawayn ay jecelyihiin, waase in loo sheegaa in arrinku uuna saa ahay ee la doonaaayo in dhalaanku si xur ah u hadlo oo wixii ay qabaaan sheegaan.

**Lafaaqa 3aad:arrimaha laga hadlaayo iyo tusaalayn suaalo ku saabsan qatarta amaanka:**

**Nolol maalmeedka:**

- Waamaxay farsamda dumarka iyo raggu ay leeyihiin una suura gelinaayo in ay ka helaan nolol maalmeed.
- Intuu la ekaan karaa waqtiga ay shaqayn karaan si ay uga helaan nolol maalmeed.
- Qof waliba oo bulshada ka tirsan howsha ku aadan maxay tahay intee waqti ah ayay ku qaadataa.
- Dumarku wax dhib ah ma waajahaan sida dhib miyay kala kulmaan suuq tegista, adeega, farsamada, deen qaadashada, tababarka iyo xog helista. Mise awood uma laha in ay ka qaybgalaan go'aan qaadashada.Raguna sidoo kale miyuu la kulmaa???
- Yaa awood u leh in adeegsadaan dhamaan ilaha wss ?( yaa shaqo haysta, yaa suuqa uu u furanyahay, yaa shidaalka xaabada heli kara iwm.
- Yaa go'aan ka gaara sida loo isticmaalayo wss ? yaa go'aan ka gaaraya in lagu milmi karo mujtamac loo soo marti galay ? yaana go'aan ka gaari kara dib ugu noqoshada dalkii hooyo?
- Waa maxay saamaynta ay arrimahan ku yeelan karaan qaas ahaan wiilasha, gabdhaha, dhallinyarada, haweenka iyo raga, dhallaanku miyay shaqeeyaan, nooc ma waaye shaqooyinka ay ka shaqeeyaan.??

**Tacliinta:**

- Side ku dhamaystaan gabdhaha iyo wiilasha waqtigooda?
- Yaa iskoolka taga ? yaan iskoolka tegin ?
- Gabdhaha aan iskoolka tegin maxay sameeyaan? Wiilashana maxay sameeyaan?
- Maxay sameeyaan gabdhaha iskoolka taga markay iskooka ka yimaadeen ? wiilashana maxay sameeyaan markay iskoolka ka yimaadeen?
- Adigu miyaad baqaysaa, dhallaankaagu mayay baqanayaan ? markay iskuulka u socddaan ama wax ay ka baqaan baa jira iskoolka xagiisa??

- Yaa guriga ku soo hara ? yaa ka masuul ah guriga? Waa maxay sameeynta reerka?
- Side loo arkaa gabdhaha iyo wiilasha hadii ay ka haraan waalidkoodna uu ku noqdo wadankii iyaguna iskuulkii ay weli ku haraan,

**Ka qaybgalka bulshada:**

- Haweenka miyay ka qaybqaataan arrimaha bulshada ? maxayna u ahayn ama ilaa iyo xadkee ? dhallaanku miyay ka qayb qaataan ?
- Haweenku fursad ma u haystaan in ay ka qaybqaataan talo gaarista ? talo go'aamo miyay bixiyaan ? maxay la tahy haweenka arrinkaas? Raguna side la tahay ? saamaynta bulshada side tahay ?
- Side ragu iyo haweenku uga qayb qaataaan dib u dhiska dalkoodii hooyo ama talo bixinta marka la sameynaayo gole gudaha ah?

**Caafimaadka/cuntada/nafaqada/ hooyga:**

- Muxuu yahay cudurka ugu baddan ee bulshadu ka cabanayso ?
- Yaa masuulka ah markii qof ama ruux bulshada ka mid ah uu xanuunsado?
- Yuu yahay ruuxa ay arkaan markay bulshadu dareento wax aan sax ahayn ama ay xanuunsadaan?
- Maxaa dhaca hadii ay habeenkii xanuun yimaado ? ama waqtiga fasaxa asbuuca ay arrin ku timaado?
- Maxay yihiin nooca xanuunada aadka loo daweeyo iyo nooca aan waxba laga qaban karaynin?
- Bulshada miyay ka jiraan dhallan aan helin cuntada ku haboon, mise waxaa jira dad kale oo aan helin cunto ku fillan?
- Sidee haweenka uurka leh ama markaas nuujinaaya ay cuntadooda uga duwantahay kuwa kale ee guriga ay iskala tirsanyihiin?
- Side u isticmaashaa biyaha, sideena u ilaalisaa sixada guud ee bulshadaada.
- Side guryaha iyo deriska wada jirkooda loo ilaaliyaa si looga fogaado halis ku timaado sixo darida ? maxay tahay sadxiga shaxda farsamada deegaanka, ma

magaalaa mise waa xero.??

**Nabadgelyada iyo amaanka :**

- Waa maxay qatarta ay ku siisay waaya aragnimada deegaankan ?
- Ma dareemaysaa in ay Qatar ku jirto amaankaaga jir ahaan iyo nabadgelyada guud , sii ba xiliyadee??? Iyo maxay tahay sababta.
- Maxay tahay ilaha nabadgelyo darida, yaana ka dhex muuqda.
- Maxaad ka welweshaa markaad guriga ka baxdo?
- Maxaad ka welweshaa ma caruurta, xaaska iwm?
- Ma ka war haysaa wax rabshado ah ee cabsi geliyay naftaada, deriskaaga iyo saaxiibadaa?
- Side kula tahay in lagu joojin karo gardarada ka dhacdaa guryaha?.
- Xad gudub gardaro ah miyuu dhacaa , waase noocee haduu dhaco?
- Side raggu u fekerayaa arrimaha ku saabsan xad gudubka ? haweenkana side u arkaan, dhallaankuna side u arkaan iyo adigana side u aragtaa.??
- Maxaa laga samayn karaa??
- Xagee bay ka dhacdaa badanaabo ( bal eeg la noolaan shaha halista iyo raadinta xuluusha iyo kala mudnaysiintooda ).

**La noolaanshaha qatarta iyo raadinta xuluusha :**

- Sided u malaynaysaa in xuluul lagu gaari karo? Sideese u arkaysaa in aad ku xallin kartaan adiga iyo deriskaaga?
- Maxaad samayni oo aad ku ilaalin kartaa dhallaankaaga.
- Maxaa adeeg ah oo jira si looga hortago qatarta jirta?
- Muxuu ka qaban karaa dhaqankaaga iyo waxa aad aaminsantihiin. Miyay jireen mushkiladahaan oo kele markii la joogay wadankiina.
- Ma rajay naysaa in aad wax ka qabato mushkiladaha jira, side u malaynaysaa in aad wax uga qaban kartid??

**Kala mud naysiinta qatarta:**

- Dhamaan arrimahii laga soo wada hadlay, arrinkeed moodaa in uu yahay midka ugu muhiimsan looguna baahanyahay si degdeg ah.
- Yaa lagama maar maan ah in uu ka muuqdo?
- Maxay tahay kaalinta bulshada ay ka gaysan karto xallinta mushkiladahan oo kale.



## LIFAAQA 4-AAD :FOOMKA HABAYNTA

Tirada Dadka:__ Da'da Kooxda:__) Kooxda: _____Koox Hoose: (Jinsi:_____
Fududeeyayaasha:____________________

Taariikhda: _____Qodobka laga hadlaayo: _______Goobta:________________________
wadanka: ___________

| Halista Amanka/ Mushkiladaha | Sababaha | Awooda Bulshada | Xuluusha ay soo Gudbiyaan Kooxaha Hoose | Arimaha Ugu Muhiimsan ee wax laga qabanayo sida ay soo jeediyeen Bulshada ay quseyso | Deg Deg Dabagalka |
|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | |
| | | | | | |
| | | | | | |

## LIFAAQA 5-AAD :FOOMKA HABAYNTA

Tirada Dadka:__ Da'da Kooxda:__) Kooxda: _____Koox Hoose: (Jinsi:_____ Fududeeyayaasha:____________________

Taariikhda: _____Qodobka laga hadlaayo: _______Goobta:________________________ wadanka: ___________

| Halista Amanka/ Mushkiladaha | Sababaha | Awooda Bulshada | Xuluusha ay soo Gudbiyaan Kooxaha Hoose | Arimaha Ugu Muhiimsan ee wax laga qabanayo sida ay soo jeediyeen Bulshada ay quseyso | Deg Deg Dabagalka |
|---|---|---|---|---|---|
| **La'aan la la'yahay amaan jireed, tusaale wiilasha xaafada waxay ku xad gudbaan gabdhaha.**<br><br>**-gabdhuhu waxay ka baqdaan iskool tegis**<br><br>**Waxay u baqdaan jirkooda.**<br><br>**Gabdhuhu waxaa laga yaabaa in ay iska dhaafaan iskoolka**<br><br>**-waxay halis ugu jiraan in la kufsado** | -midabtakoor<br><br>-Takoor qaxootinimo<br><br>-garasho la'aan | -kaalinta bulshad waxay ka gaysan karto | Abaabulka dhallaanka iyo bulshada inteeda kale | -gabdhaha oo iskoolka taga iyo amaankooda oo la sugo | **In bulshada lala shaqeeyo . wacyigelinta bulshada deegaanka** |
| **Jir gadasho/**<br><br>**-gabdhaha ma laasimi karaan kondomka (waxaa ku saa'id ku ah kufsi iyo HIV)** | Cabsi in la diido and amaan daro.<br><br>- jir dil<br><br>-jir gadasho si ay u helaan dhaqaale | Jir ahaa karti loo leeyahay howlo kala duwan samayntood.<br><br>-ilaa xad heer waxbarasho. | Wargelin guud.<br><br>-kala xaajood dadka ay qusayso.<br><br>-sare u qaadis wacyiga | Iyadoo la soo yaraynaayo qatarta uu geeysto kufsiga iwm | **Diiwaangelinta dhacdooyinka.**<br><br>**-booqashada** |

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| -takoor bulshada<br><br>-mushaar ka yar raga waxa ay qaataan | | - wacyi gelin heer la eg bulshad dhexdeeda | dhalinyarada. | | xarumah a caafimaa dka.<br><br>- booqasho qooysask a qaxootiga ah |
| -gabdhaha oo iskoolka tegin<br><br>-gabdhaha iskoolka way is ka daayeen si ay u shaqaystaaan<br><br>-gabdhahu iskoolka way ka tagaan si ay mustaqbal fiican u gaaraan<br><br>-uur waqti hore ku yimaada dartis.<br><br>Iyo cuduro hallis ah oo ku dhaca | -qalabka wax barashada oo aan jirin.<br><br>-lacag la'aan dharka iskoolka<br><br>-faqri iyo daqli la'aan | Dadk waa wayn karti bay u leeyihiin in ay ka gorgortamaa n shaqada ay qabanayaan | -odayaasha qaxootiga oo kala xaajooda bulshada martida loo yahay.<br><br>Samayn hishiisyo shaqo lala samaysto gabdhaha waalidiintood a.<br><br>-xafiisyada oo saacida bulshada qaxootia ah rag iyo haweenba | Yareenka qatarta ka imaankarta uurka hore loo qaado .<br><br>-raadinta ilo wax soo saar leh | Hel arrimaha quseeya dharka iskoolka.<br><br>-kala hadal gabdhaha kale sida nolosha tahay .<br><br>-waydii macalimii nta iyo waalidka sida wax lagu xallin karo. |

Lifaaqa 5-aad Ka Qaybgalka Shaandhaynta iyo Warbixinta Kala Mudnaanta

Koox___________Koox Hoose_________(Jinsi"_____ Da'da Kooxda_________)

Xaalada ( Magaalo,Xero ama Soo Noqdayaal)_____________Wadanka___________

| **1-Xadgudub xuquuq al insaan** | **2- qatarta amaanka iyo dhacdooyinka** | **3- sababaha** | **4-awooda** | **5-xuluusha ay soo jeediyeen bulshada** | **6-hadafka amaanka looga danleeyahay** |
|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | |
| | | | | | |
| | | | | | |

Lifaaqa 6: xog ururinta fadhiyada

| **Qaabka suaalaha** | **Dhigig/da'a iyo xogta la hayo** | **Lab/da' iyo xogta la hayo** | **Cadada tirade dadka lala kulmay** |
|---|---|---|---|
| **Indha indhaynta Ka qaybgalka** | | | |
| **Hadalo la habeeyay** | | | |
| **Wadahadalka kooxda xooga la saarayo** | | | |

Lifaaqa 6aada: habka loo ururiyo xogta fadhiyada

| Qaabka suaalaha | Dhigig/da'a iyo xogta la hayo | Lab/da' iyo xogta la hayo | Cadada tirade dadka lala kulmay |
|---|---|---|---|
| **Waxyaabihii la la kulmay** | Dugsiyada oo dhan, biyaha meelaha laga darsado, meelaha cunto qaybintaiwm | Xuduud soo gudbida | |
| **Hadalo la habeeyay** | -Hogaamiyeyaasha qaxootiga 7<br><br>-Macalimiinta qaxootiga.5<br><br>-gudiga waalidiinta.3<br><br>Qaxootiga ka shaqeeya caafimaadka3.<br><br>Bulshada martida loo yahay 10 | -Hogaamiyeyaasha qaxootiga 7<br><br>-Macalimiinta qaxootiga.5<br><br>-gudiga waalidiinta.3<br><br>Qaxootiga ka shaqeeya caafimaadka3.<br><br>Bulshada martida loo yahay 10 | -Hogaamiyeyaasha qaxootiga 14<br><br>-Macalimiinta qaxootiga.10<br><br>-gudiga waalidiinta.6<br><br>Qaxootiga ka shaqeeya caafimaadka6.<br><br>Bulshada martida loo yahay 20 |
| **Wadahadalka kooxda xooga saaraysa ( focus group)** | Kooxaha da'ada laga rabo:<br><br>-(10-13):13<br><br>-(14-17):14<br><br>-(18-39):15<br><br>-(40-+):15 | Kooxaha da'ada laga rabo:<br><br>-(10-13):13<br><br>-(14-17):14<br><br>-(18-39):15<br><br>-(40-+):15 | Kooxaha da'ada laga rabo:<br><br>-(10-13):26<br><br>-(14-17):28<br><br>-(18-39):30<br><br>-(40-+):30 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| **Wadahadalka keli kelida ah** | -Xubnaha ugu liita :5<br><br>-lagabadnayaasha :5<br><br>-bulshada loo soo martiayay:5<br><br>-howlfuliyayaasha UNta:5<br><br>-kooxo kala duwan ee dowlada matala:5<br><br>-Kuwo kale:5 | -Xubnaha ugu liita :5<br><br>-lagabadnayaasha :5<br><br>-bulshada loo soo martiayay:5<br><br>-howlfuliyayaasha UNta:5<br><br>-kooxo kala duwan ee dowlada matala:5<br><br>-Kuwo kale:5 | -Xubnaha ugu liita :10<br><br>-lagabadnayaasha :10<br><br>-bulshada loo soo martiayay:10<br><br>-howlfuliyayaasha UNta:10<br><br>-kooxo kala duwan ee dowlada matala:10<br><br>-Kuwo kale:10 |

**Lifaaqa 7aad: Tusaalayn waqtiga kulanada**

| **Xafiis XX** | **Kooxda: A** | **Kooxda:B** | **Kooxda:C** |
|---|---|---|---|
| **Asbuuc ka hor** | Habaynta kooxaha wadajirka u shaqaynaya (MFT), habaynta afkaar kala duwanaanta, qaabka, arrimaha laga hadlayo, sahlida wadahadalka, qaabka wargelinta kooxaha ay qusayso, iyo habka dabagalka sida degdegta ah iyo sidii look ala sii saari lahaa kooxo yaryar loona qarshaysan lahaa waqti ku haboon. | | |
| **Maalmo ha hor** | Si kooban uga faalood ururka haweenka iyo sida ay kaalin uga gaysan karaan ka qaybgalka shaandhaynta | Si kooban uga faalood ururka dhallinyarada iyo mabaadiida iskoolka iyo sida ay kaalin uga gaysan karaan ka qaybgalaka shaandhaynta | Si kooban uga faalood raga iyo dumarka hogaamiye yaasha sida ay uga qayb qaadan karaan ka qaybgalka shaandhaynta |
| **Maalinta 1aad** | | | |
| **09h00-10h00** | Indhaindhaynta iskoolada | Indhaindhaynta xarunta bulshada | Indhaindhaynta xarumaha caafimaadka |
| **10h00-12h00** | Guddiga xoogsaarista (F.G.) iyo gabdhaha da'doodu ka yartahay 18 | Guddiga xoogsaarista (F.G.) iyo gabdhaha da'doodu ka yartahay 18 | Guddiga xoogsaarista (F.G.) iyo haweenka da'doodu u dhaxayso (18-40) |
| **12h00-13h00** | Foomka habaynta | Foomka habaynta | Foomka habaynta |

| | | | |
|---|---|---|---|
| **14h00-16h00** | Guddiga xoogsaarista (F.G.) iyo wiilasha da'doodu ka yartahay 18 | Guddiga xoogsaarista (F.G.) iyo wiilasha da'doodu ka yartahay 18 | Guddiga xoogsaarista (F.G.) iyo raga da'doodu u dhaxayso (18-40) |
| **16hoo-17h00** | Foomka habaynta | Foomka habaynta | Foomka habaynta |
| **Maalinta #** | | | |
| **09h00-10h00** | Indha indhayn isla markiiba ah | Dabagal isla markiiba ah | Siyaaro gui |
| **10h00-12h00** | Guddiga xoogsaarista (F.G.) iyo raga da'doodu u dhaxayso (40+) | Guddiga xoogsaarista (F.G.) iyo raga da'doodu u dhaxayso (40+) | Guddiga xoogsaarista (F.G.) iyo raga da'doodu u dhaxayso (40+) |
| **12h00-13h00** | Foomka habaynta | Foomka habaynta | Foomka habaynta |
| **14h00-16h00** | Guddiga xoogsaarista (F.G.) iyo dumarka da'doodu u dhaxayso (40+) | Guddiga xoogsaarista (F.G.) iyo dumarka da'doodu u dhaxayso (40+) | Guddiga xoogsaarista (F.G.) iyo dumarka da'doodu u dhaxayso (40+) |
| **16hoo-17h00** | Foomka habaynta | Foomka habaynta | Foomka habaynta |
| **Maalinta #** | | | |
| **09h00-10h00** | Siyaaro guryaha dadka naafada ah | Indha indhayn isla markiiba ah | Siyaaro guri |
| **10h00-12h00** | Guddiga xoogsaarista (F.G.) iyo gabdhaha da'doodu u dhaxayso (10-13) | Guddiga xoogsaarista (F.G.) iyo gabdhaha da'doodu u dhaxayso (10-13) | |
| **12h00-13h00** | Foomka habaynta | Foomka habaynta | Foomka habaynta |
| **14h00-16h00** | Guddiga xoogsaarista (F.G.) iyo wiilasha da'doodu u dhaxayso (10-13) | Guddiga xoogsaarista (F.G.) iyo wiilasha da'doodu u dhaxayso (10-13) | Guddiga xoogsaarista (Focus Group ) raga da'doodu u dhaxayso (18-40 |
| **16hoo-17h00** | Foomka habaynta | Foomka habaynta | Foomka habaynta |
| **Maalinta #** | | | |
| **09h00-10h00** | Siyaaro guri | Siyaaaro guri | Indha indhayn |

| | | | |
|---|---|---|---|
| **10h00-12h00** | Wadahadal iyo gudiga xoog saarista ( focus group ) | | Wadahadal iyo gudiga xoog saarista ( focus group ) |
| **12h00-13h00** | Foomka habaynta | Xafiiska iyo arrimo la xiriira | Foomka habaynta |
| **14h00-16h00** | Wada hadal qaabaysan oo hanaysan | Wada hadal qaabaysan oo hanaysan | Wada hadal qaabaysan oo hanaysan |
| **16hoo-17h00** | Foomka habaynta | Foomka habaynta | Foomka habaynta |
| **Maalinta #** | Daba galka howlahii la soo qabtay ( bulshada oo la wargeliyo, xilliga bisha 7aad) | | |
| **Maaalinta #** | Kala mudnaysiinta foomamka | | |
| | Iyadoo xogta macluumaadka la diiwaan geliyo shirarkii oo dhan iyo in loo tabaabushaysto qorshaha ka qaybgalka. | | |

**Fariimaha ugu dambeeya**:

1-Eeg ajendaha ku saabsan amaanka, UNHCRts, Oktoober 2003, ujeedada 3aad. Ujeedada 4aad: bulshada qaxootiga sare loo qaaday awoodooda si ay u gaaraan in ay iyagu is amaan geliyaan. Ujeedada 5aad, hadafka 7aad : in la gaaro isku filnaasho bulshada qaxootiga. Hadafka 6aad, kulanka iyo wada hadalka baahida amaanka haweenka qaxootiga ah iyo dhalaanka.

2-xog intaas dhaafsan eek u saabsan ka qaybgalka , akhri iyana UNHCRta kutubkeeda ee loogu tala galay horumarinta ku salaysan bulshada ee soo socdo. Booga loo yaqaan horumarinta kaalmada loogu talagalay barnaamijyada qaxootiga (DAR). Waa kutub loogu tala galay qorshaynta iyo howlgelintiisa, Janaayo 2005, qaybta IIIaad lifaaqa II iyo buuga iskaa wax u qabso , qalabka 4 iyo 5 .

3-akhri, xoojinta horumarrinta ku salaysan bulshada, UNHCRta , EC/51/SC/CRP.6,15 February 2001. Horumarrinta bulshad ku salaysan oo loola jeedo in la xoojiyo awooda qaxootiga iyo ka qaybgalka howlaha, si loo xoojiyo karaamada iyo isku filnaanta si loo gaaro isku filnaasha buuxda ee bulshada qaxootiga aha.

4-iyadoo u jeedada tahay qalabka isticmaalkiisa kalimada qaxooti waa in loo gartaa in ay ka mid tahay dadka dalka gudahiisa ku qaxay, dadka dalkooda ku soo noqday iyo dadka ay danaynayso UNHCRta.

5- akhri qorshaha ka qaybgalka ee UNHCRta, diiwaanka gaar hayaha ah.

6-akhri buuga UNHCRta ee loo yaqaan casharka 4aad, fqorshaynta iyo dhaandhaynta

7-akhri buuga UNHCRta , Oktoobar 2002, casharka 4aad, qaybtiisa 14aad ee howlgalka habka maamulka.

8-gudiga joogtada ah ee loo yaqaano (ISAC) waxay iku afgarteeen in la abuuro gudi si buuxda, xoogna leh uga jawaabo arrimaha binoaadmi nimada si wada jir ahna uga wada shaqeeyaan. Akhri mabaadiida (ISAC) iyo waxa ka soo baxay bishii 12aad 2005, ee golaha qaramada midoobay , A/RES/58/177 ee 2004, iyo xoghaya guud ee QM, si aad u balaaran 2005. Gudiga (ISAC) waxaa la abuuray bishii June 1992 si looga jawaab celiyo go'aanada ka soo baxay QM ee 46/182 si loo xoojiyo arrimaha bino aadmi nimada.

9- akhri Booga loo yaqaan horumarinta kaalmada loogu talagalay barnaamijyada qaxootiga (DAR)., iyo buuga qorshaynta iyo howlgalka ibd iyo buuga dib ucelinta iyo dib ugumid noqoshada ee UNHCRta , May 2004

10- joogtaynta afkaarta kala duwan waxaa loola jeedaa dhamaan xogta , qabiilka, naafada, diimaha, habka-dhaqan dhaqaale, aqoonta , tacliinta, iyo jinsiyada iwm.

11-siminaarkii 2aad ee kooxaha ee hirgelinta ku salaysan xuquuqda bino aadamka iyadoo lagu salaynaayo mabaadiida QM USA,5-7May 2003.

12- iyadoo laga soo xogtay qalabka ku xad gudubka ( raga iyo haweenka)

13-akhri qorshaha qorshaynta dadwaynaha UNHCRta 1992.

14-akhri gar hayaha qorshaha ka qaybgalka UNHCRta ,

15-akhri lifaaqa 2aad iyo xubnaha ugu sareeyo eek u saabsan amaan gelinta.

16-xog dheeraad ah , akhri Booga loo yaqaan horumarinta kaalmada loogu talagalay barnaamijyada qaxootiga (DAR).,

17- xaaladaha shaqsi shaqsiga ( SGBV) waa in aan looga hadlin wadahadalka koox kooxda, laakin xilka bulshada waa in ay ka hortagaan arrimaha kufsiga.

18 –kor u qaadista xaalada reer guuraaga iyo ka qaybgalkooda, akhri buuga Katoliga ah ee adeega gargaarka; Baltimore, 1999.

19- akhri lifaaqa 3aad ee ku saabsan tusaalayn qodobada laga hadlaayo.

20-marka laga hadlaayo dadka ku bara kacay dalkooda gudahiisa, shaandhaynta gudiga wada jirka ah ayaa waxay dooranayaan qodobada laga doodayo si loo taxliiliyo amuuraha ku saabsan amaanka .

21 waxaa laga soo qaatay ARC, oktoobar 2002.

22- ka qaybgalka dhallaaanka si xoog leh ayaa loo tixgelinayaa iyadoo lagu salaynaayo go'aanada ka soo baxay QM iyo xuquuqda dhalaanka iyo mabaadiida raacda.